161. Waxaad Dhahdaa wuxuu Igu Hanuuniyey Eebahay Jid Toosan Diin Sugan oo Diintii (Nabi) Ibraahim isagoo toosan oon gaalada ka mid ahayn.

قُلْ إِنَّنِي هَدَىٰنِي رَبِّيٓ إِلَىٰ صِرَٰطٍ مُّسْتَقِيمٍ دِينًا قِيَمًا
مِّلَّةَ إِبْرَٰهِيمَ حَنِيفًا ۚ وَمَا كَانَ مِنَ ٱلْمُشْرِكِينَ ﴿١٦١﴾

162. Waxaad Dhahdaa Salaaddayda, waxaan Gawrici, Noloshayda iyo Geeridaydaba Eebaa iska leh Eebaha Caalamka ah.

قُلْ إِنَّ صَلَاتِي وَنُسُكِي وَمَحْيَايَ وَمَمَاتِي لِلَّهِ
رَبِّ ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿١٦٢﴾

163. Wax la Wadaagana ma jiro, Saasaana lay faray Anigaana ugu horreeya Muslimiinta (Ummaddan).

لَا شَرِيكَ لَهُۥ ۖ وَبِذَٰلِكَ أُمِرْتُ وَأَنَا۠ أَوَّلُ ٱلْمُسْلِمِينَ ﴿١٦٣﴾

164. Waxaad Dhahdaa ma wax ilaah ka soo hadhay yaan Eebe ka dooni (Dhigan) Isagoo ILaahay wax walba Eebe u ah, naf kastana waxay kasbato waa uun Korkeeda, Nafna Dambi naf kale ma Qaaddo, Xagga Eebihiin umbaana laydiin Celin, wuxuuna idiinka warrami waxaad isku Diidanaydeen.

قُلْ أَغَيْرَ ٱللَّهِ أَبْغِي رَبًّا وَهُوَ رَبُّ كُلِّ شَيْءٍ ۚ وَلَا تَكْسِبُ
كُلُّ نَفْسٍ إِلَّا عَلَيْهَا ۚ وَلَا تَزِرُ وَازِرَةٌ وِزْرَ أُخْرَىٰ ۚ
ثُمَّ إِلَىٰ رَبِّكُم مَّرْجِعُكُمْ فَيُنَبِّئُكُم
بِمَا كُنتُمْ فِيهِ تَخْتَلِفُونَ ﴿١٦٤﴾

165. Eebana waa kan idinka Yeelay kuwo Dhulka u Hadhay, Qaarkiinna qaar ka sara mariyey Darajooyin, inuu idinku Imtixaamo wuxuu idin siiyay, Eebana waa Deg degtaa Ciqaabtiisu waana Dambi Dhaafe Naxariista.

وَهُوَ ٱلَّذِي جَعَلَكُمْ خَلَٰٓئِفَ ٱلْأَرْضِ وَرَفَعَ
بَعْضَكُمْ فَوْقَ بَعْضٍ دَرَجَٰتٍ لِّيَبْلُوَكُمْ
فِي مَآ ءَاتَىٰكُمْ ۗ إِنَّ رَبَّكَ سَرِيعُ ٱلْعِقَابِ وَإِنَّهُۥ
لَغَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿١٦٥﴾

Halkanna wuxuu Eebe faray Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) inuu Sheego Inuu ku Toosanyahay Diin Fiican oon Qallooc lahayn, oo ah Diintii Nabi Ibraahimkii Toosnaa, iyo Salaadda Camalka iyo Gawraca, Noloshooda iyo Geeridoodaba Eebe iska leeyahay ee wax lawadaagaa uusan Jirin, Nabiguna waa Imaamka Ummaddan iyo Mu‘miniinta oo dhan, waxaan Eebe ahaynna Eebe lagama Dhigto Illeen isagaa wax walba Eebe u ahe. Naf walbana waxay kasbatay iyadaa ka masuula, Nafna Naf kale Dambigeeda ma Qaaddo, Dhammaanna Eebaa loo Noqon, Caddaynna wixii laysku Diidanaa, waana kan inaga yeelay kuwa Camira Dhulka oo ku Noolaada, kalana Duway Dadka oo ka yeelay mid Cilmi leh, Mid Jaahil ah, mid Xoola leh, mid saboola, Mid Eebe ka Yaabi, mid kale iyo wax la mida, Imtixaan Dartiis. Eebana waa Deg degtaa Ciqaabtiisu waana Dambi Dhaafe Naxariista, Suuradduna waxay ku dhammaatay Cabsi galin iyo Rajo galin oo ah sida quraanka ku badan, si aan laysu Illoobin, ama looga Quusanin Naxariista Eebe. Al-Ancaam (161-165).

# Suurat Al-Acraaf سُورَةُ الأَعْرَافِ

Magaca Eebe yaan ku Billaabaynaa ee Naxariis Guud iyo mid Gaaraba Naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَٰنِ الرَّحِيمِ

1. (Waxay ku Tusin Mucjisada Quraanka).

المص ﴿١﴾

2. Kani waa Kitaab aannu kuu soo Dejinnay ee yeyna Laabtaada Dhibi (Cidhiidh) ahaan inaad ugu Digto, waana Waanada Mu‘miniinta.

كِتَابٌ أُنزِلَ إِلَيْكَ فَلَا يَكُن فِي صَدْرِكَ حَرَجٌ مِّنْهُ
لِتُنذِرَ بِهِ وَذِكْرَىٰ لِلْمُؤْمِنِينَ ﴿٢﴾

3. Raaca waxa Laydiinka soo Dejiyey Xagga Eebe, hana Raacina wax ka soo hadhay oo Awliyo ah (Gargaara ah) yaraana intaad Waantoobaysaan.

اتَّبِعُوا مَا أُنزِلَ إِلَيْكُم مِّن رَّبِّكُمْ وَلَا تَتَّبِعُوا
مِن دُونِهِ أَوْلِيَاءَ ۗ قَلِيلًا مَّا تَذَكَّرُونَ ﴿٣﴾

4. Badanaa Intaan Magaalo Halaagnay oo u Timid Ciqaabtanadii iyadoo Jiifta (Habeen) ama Qayluushan (Maalin).

وَكَم مِّن قَرْيَةٍ أَهْلَكْنَاهَا فَجَاءَهَا بَأْسُنَا بَيَاتًا
أَوْ هُمْ قَائِلُونَ ﴿٤﴾

5. Baryadoodu (Qayladooduna) markuu u Yimid halaagganagu ma ahayn waxaan ahayn inay Dhahaan annagaa daalimiin ahayn.

فَمَا كَانَ دَعْوَاهُمْ إِذْ جَاءَهُم بَأْسُنَا إِلَّا أَن قَالُوا
إِنَّا كُنَّا ظَالِمِينَ ﴿٥﴾

6. Waana Warsanaynaa kuwii loo Diray (Ummadihii waxay ku Jawaabeen) waana warsanaynaa kuwii la Diray (Rasuulladii inay Gaadhsiiyeen).

فَلَنَسْأَلَنَّ الَّذِينَ أُرْسِلَ إِلَيْهِمْ وَلَنَسْأَلَنَّ
الْمُرْسَلِينَ ﴿٦﴾

7. Waana uga Warramaynaa Ogaansho mana aanaan ka Maqnayn.

فَلَنَقُصَّنَّ عَلَيْهِم بِعِلْمٍ ۖ وَمَا كُنَّا غَائِبِينَ ﴿٧﴾

Kitaabka Quraanka ah waa Kitaab Xaq ah oo Nabiga lagu soo Dejiyey, mana aha inuu Cidhiidhi ku galo Gaadhsiintiisa, waana Waanada Mu‘miniinta, waana in la Raaco Quraankan Eebe soo Dejiyey, mana aha in la Raaco Xukun Eebe Xukunkiisa ka soo hadhay, wax waano qaadanna waa yar yahay.
Imisaa la halaagay Magaalo Goor Habeena ama Maalin, Markaasna ku Qaylyeen inay Daalimiin ahaayeen, Eebana wuu warsan Umadaha waxay ugu Jawaabeen Nabiyada, Rasuulladana waxaa la warsan inay Gaadhsiiyeen Xaqii, Eebana wax walba waa Ogyahay wax ka Qarsoonna ma jiro Illeen Eebe inagama maqnee, Rasuulkana (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu Yidhi: Dhammaantiin waxaad tihiin ILaaliye Dhammaantiinna waa laydin warsan. Al-Acraaf (1-7).

---

8. Miisaanku waa Xaq Maalintaas (Qiyaamada) Cidday Cuslaato Miisaankiisa (Fiican) Kuwaasu waa uun kuwa Liibaanay.

وَالْوَزْنُ يَوْمَئِذٍ الْحَقُّ ۚ فَمَن ثَقُلَتْ مَوَازِينُهُ
فَأُولَٰئِكَ هُمُ الْمُفْلِحُونَ ﴿٨﴾

9. Cidduu Fududaado Miisaankiisuna kuwaasuna waa kuwa Khasaariyey Naftooda Dulmigay ku Falayeen Aayaadkanaga Dartiis.

وَمَنۡ خَفَّتۡ مَوَٰزِينُهُۥ فَأُوْلَٰٓئِكَ ٱلَّذِينَ خَسِرُوٓاْ
أَنفُسَهُم بِمَا كَانُواْ بِـَٔايَٰتِنَا يَظۡلِمُونَ ٩

10. Waxaan idin Makaninay Dhulka waxaana idiinka Yeellay Meel lagu Noolaado, waxaase yar Intaad Shukriyeysaan.

وَلَقَدۡ مَكَّنَّٰكُمۡ فِي ٱلۡأَرۡضِ وَجَعَلۡنَا لَكُمۡ فِيهَا
مَعَٰيِشَۗ قَلِيلٗا مَّا تَشۡكُرُونَ ١٠

11. Waan idin Abuurray (Nabi Aadan) waana idin Suuraynay, markaasaan ku nidhi Malaa‘igta u Sujuuda (Nabi) Aadam (Salaan) wayna Sujuudeen, Ibliise ma ahayn kuwa Sujuuda.

وَلَقَدۡ خَلَقۡنَٰكُمۡ ثُمَّ صَوَّرۡنَٰكُمۡ ثُمَّ قُلۡنَا لِلۡمَلَٰٓئِكَةِ
ٱسۡجُدُواْ لِأٓدَمَ فَسَجَدُوٓاْ إِلَّآ إِبۡلِيسَ
لَمۡ يَكُن مِّنَ ٱلسَّٰجِدِينَ ١١

12. Wuxuu Yidhi (Eebe) maxaa kaa reebay inaad Sujuuddo markaan ku faray, wuxuu Yidhi anaa ka Khayr roon, waxaad iga Abuurtay Dab isagana waxaad ka Abuurtay Dhoobo.

قَالَ مَا مَنَعَكَ أَلَّا تَسۡجُدَ إِذۡ أَمَرۡتُكَۖ قَالَ أَنَا۠ خَيۡرٞ مِّنۡهُ
خَلَقۡتَنِي مِن نَّارٖ وَخَلَقۡتَهُۥ مِن طِينٖ ١٢

Eebe waa Caadil, wuxuuna oogi Qiyaamada Miisaan Xaq ah, Ciddii khayrkeedu badnaadana waa Liibaantay, tii Khayrkeedu Yaraadana way Khasaartay Isagaana Dulmi falay, markaasuu Eebe Xusuusiyey Addoomadiisa siduu ugu Nicmeeyey, Dhulkana ugu Sugay una Makaniyey, wayse Shukri yaryihiin, markaasuu hadana Xusuusiyey siduu u Sharifay Aabahood Nabi Aadam, Malaa‘igtana u faray inay Qaddariso, wayna Yeeleen oo Faleen wuxuu Eebe faray, Ibliise isagu wuu Diiday inuu wayneeyo Nabi Aadam, wuuna Xasday wuxuuna Sheegay inuu isagu ka Fiicanyahay, Illeen Dabbaa laga Abuuray, Nabi Aadamna Dhoobee, waana Qiyaas beena oo Xun.
Cid kastoo Nasab, Dhalasho, iyo Asal si Xun ugu Faanta oo Xaqa ku Diidana Ibliisbaa Bare iyo Hogaamiye u ah, Dadkuna waxay ku kala Fiicanyihiin Eebe ka Yaabid, Wanaagga, Sharafta iyo Akhlaaqda Fiican ee wax tarka ah Mase aha waxaan ahay Hebel. Al-Acraaf (8-12).

---

13. Wuxuu Yidhi (Eebe) ka Daga Xaggeeda (Jannada) Xaq uma lehid inaad isku Dhex Kibriside, Bax waxaad ka mid tahay kuwa Dullaysane.

قَالَ فَٱهۡبِطۡ مِنۡهَا فَمَا يَكُونُ لَكَ أَن تَتَكَبَّرَ
فِيهَا فَٱخۡرُجۡ إِنَّكَ مِنَ ٱلصَّٰغِرِينَ ١٣

14. Wuxuu Yidhi ii sug tan iyo Maalinta la soo Bixin.

قَالَ أَنظِرۡنِيٓ إِلَىٰ يَوۡمِ يُبۡعَثُونَ ١٤

15. Wuxuu Yidhi (Eebe) waxaad ka mid tahay kuwa la sugi.

قَالَ إِنَّكَ مِنَ ٱلۡمُنظَرِينَ ١٥

16. Wuxuu Yidhi Ibaadiyeyntaada Darteed waxaan u Fadhiisan Jidkaaga Toosan (waan Dhumin).

قَالَ فَبِمَآ أَغۡوَيۡتَنِي لَأَقۡعُدَنَّ لَهُمۡ صِرَٰطَكَ ٱلۡمُسۡتَقِيمَ ١٦

17. Waxaana kaga iman hortooda, Gadaashooda, Midigta iyo Bidixda mana helaysid badankooda oo Shugriyi.

ثُمَّ لَآتِيَنَّهُم مِّنۢ بَيۡنِ أَيۡدِيهِمۡ وَمِنۡ خَلۡفِهِمۡ وَعَنۡ أَيۡمَٰنِهِمۡ وَعَن شَمَآئِلِهِمۡۖ وَلَا تَجِدُ أَكۡثَرَهُمۡ شَٰكِرِينَ ١٧

18. Wuxuu Yidhi Eebe ka bax Xaggeeda adoo Caayan oo la Dheereeyey, Ciddii ku raacdana waxaa laga Buuxin Jahannamo Dhammaantiin.

قَالَ ٱخۡرُجۡ مِنۡهَا مَذۡءُومٗا مَّدۡحُورٗاۖ لَّمَن تَبِعَكَ مِنۡهُمۡ لَأَمۡلَأَنَّ جَهَنَّمَ مِنكُمۡ أَجۡمَعِينَ ١٨

Eebe wuxuu Amray Ibliis inuu ka Baxo Jannada Eebe agteeda,Illeen kuma Habboona Eebe agtiisa isku Kibrine, wuxuuna faray inuu baxo Isagoo Dullaysan, wuxuuse Eebe Warsaday in la Sugo tan iyo Qiyaamada, wuxuuna u Ballanqaaday in la Sugi tan iyo Maalintaas, wuxuuna ku Dhaartay Ibliis inuu Dhumiyo Dadka kana Leexiyo Jidka Toosan, Dhan walbana uga imaan, una qurxin adduunka, wuxuuna Eebe ugu Jawaabay Bax Adoo Ceeb leh oo Caayan lana Fogeeyey, Jahannamana laydinka Buuxin adiga iyo inta ku Raacdaba.

Ibliisna saasuu Col ugu yahay Dadka ayna Waajibtahay in laga Digtoonaado. Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu Yidhi: Shaydaan wuxuu u Fadhiistay Dadka Jidka wuxuuna ka Reebay Islaamidda. Hijrada, iyo Jahaadka wayna Khilaafeen oo Faleen Khayrkii Ciddii saas Yeesha oo si kasta u Dhimata Jannaday Gali. Waxaana wariyey Imaamu Axmed. Al-Acraaf (13-18).

---

19. Nabi Aadamow Dega Adiga iyo Haweenaydaadu Jannada, kana Cuna Meejaad Doontaan, hana u Dhawaanina Geedkan, ood Noqotaan Daalimiin.

وَيَٰٓـَٔادَمُ ٱسۡكُنۡ أَنتَ وَزَوۡجُكَ ٱلۡجَنَّةَ فَكُلَا مِنۡ حَيۡثُ شِئۡتُمَا وَلَا تَقۡرَبَا هَٰذِهِ ٱلشَّجَرَةَ فَتَكُونَا مِنَ ٱلظَّٰلِمِينَ ١٩

20. Waxaana Waswaasiyey Shaydaan, inuu ka Muujiyo Xagooda wixii laga Asturay oo Cawradooda ah, wuxuuna Yidhi wuxuu idinka Reebay Eebe Geedkan inaydaan Noqonin Malaa‘ig, ama aydaan Waarin.

فَوَسۡوَسَ لَهُمَا ٱلشَّيۡطَٰنُ لِيُبۡدِيَ لَهُمَا مَا وُۥرِيَ عَنۡهُمَا مِن سَوۡءَٰتِهِمَا وَقَالَ مَا نَهَىٰكُمَا رَبُّكُمَا عَنۡ هَٰذِهِ ٱلشَّجَرَةِ إِلَّآ أَن تَكُونَا مَلَكَيۡنِ أَوۡ تَكُونَا مِنَ ٱلۡخَٰلِدِينَ ٢٠

21. Wuxuuna ugu Dhaartay inaan idiin ahay Naseex.

وَقَاسَمَهُمَآ إِنِّي لَكُمَا لَمِنَ ٱلنَّٰصِحِينَ ٢١

22. Wuuna soo Dejiyey Dhagar Darteed, markay Dhadhamiyeen Geedka waxaa u Muuqday Xumaantooda waxayna ahaayeen kuwo isku Dhadhajiya Caleenta Jannada waxaana u Yeedhay Eebahood Miyaanan idinka reebin Geedan, oonan Idinku odhan Shaydaanku wuxuu idiin yahay Col Cad.

فَدَلَّىٰهُمَا بِغُرُورٖۚ فَلَمَّا ذَاقَا ٱلشَّجَرَةَ بَدَتۡ لَهُمَا سَوۡءَٰتُهُمَا وَطَفِقَا يَخۡصِفَانِ عَلَيۡهِمَا مِن وَرَقِ ٱلۡجَنَّةِۖ وَنَادَىٰهُمَا رَبُّهُمَآ أَلَمۡ أَنۡهَكُمَا عَن تِلۡكُمَا ٱلشَّجَرَةِ وَأَقُل لَّكُمَآ إِنَّ ٱلشَّيۡطَٰنَ لَكُمَا عَدُوّٞ مُّبِينٞ ٢٢

23. Waxayna Dheheen Eebow waxaan Dulminay Naftanada Haddaadan noo Dambi Dhaafin oodan noo Naxariisanna waxaan ahaanaynaa kuwo Khasaaray.

قَالَا رَبَّنَا ظَلَمْنَآ أَنفُسَنَا وَإِن لَّمْ تَغْفِرْ لَنَا وَتَرْحَمْنَا
لَنَكُونَنَّ مِنَ ٱلْخَٰسِرِينَ ﴿٢٣﴾

ILaaheen wuxuu ina Xusuusin siduu ugu Nicmeeyey Aadam iyo Xaawo Janadana u Dejiyey una banneeyey inay Nicmadeeda Cunaan marka laga Reebo hal Geed, waxaase Xasday Shaydaan, Wuuna Khayaamay isagoo u Dhaartay inuu Nasteex u Yahay, markay Geedkii wax ka Cuneenna Darajadii ka Dhacday, Cawradiina Muuqatay, Eebana Xusuusiyey inuu Shaydaan uga Digay una Caddeeyey inuu Col idiin yahay, markaasay Calaacaleen oo Qirteen Gafkoodii Eebana Naxariis warsadeen, Taasina waxay ku Tusin Tabar yarida Dadka iyo Khaldami ogiddiisa, iyo wax badso Jacaylka inkastoo loo Nicmeeyo, iyo Colnimada Ibliis iyo Khayaamadiisa, iyo in laga Digtoonaado Cid kasta oo Nasteex iska Dhigi haba Dhaartee, Illeen Cid kastoo Dhaaratay Run ma sheegaysee, iyo in Dambigu Ceebta Muujin, Kuna Khashifi, waase in Eebe la Magan galo, laguna Xidhnaado. Al-Acraaf (19-23).

---

24. Wuxuu Yidhi Eebe ka dega Qaarkiin Qaarbuu Col u yahaye, waxaana Dhulka idiinku Sugan Nagaadi iyo Raaxo tan iyo Muddo.

قَالَ ٱهْبِطُوا۟ بَعْضُكُمْ لِبَعْضٍ عَدُوٌّ
وَلَكُمْ فِى ٱلْأَرْضِ مُسْتَقَرٌّ وَمَتَٰعٌ إِلَىٰ حِينٍ ﴿٢٤﴾

25. Wuxuuna Yidhi Eebe Dhexdiisaad ku Noolaanaysaan Dhexdiisaana ku Dhimanaysaan Xaggiisaana laydinka soo Bixin.

قَالَ فِيهَا تَحْيَوْنَ وَفِيهَا تَمُوتُونَ وَمِنْهَا
تُخْرَجُونَ ﴿٢٥﴾

26. Banii Aadamow waxaan idiiin soo Dejinay Dhar Astura Xumaantiinna (Cawrada) iyo Labbis (Xarago) Dharka Dhawrsashada yaase Khayr roon, Kaasina waa Aayaadka Eebe inay Dadku wax Xusuustaan.

يَٰبَنِىٓ ءَادَمَ قَدْ أَنزَلْنَا عَلَيْكُمْ لِبَاسًا يُوَٰرِى سَوْءَٰتِكُمْ
وَرِيشًا وَلِبَاسُ ٱلتَّقْوَىٰ ذَٰلِكَ خَيْرٌ
ذَٰلِكَ مِنْ ءَايَٰتِ ٱللَّهِ لَعَلَّهُمْ يَذَّكَّرُونَ ﴿٢٦﴾

27. Banii Aadamow Yuusan idin Fidnayn Shaydaan siduu uga soo Bixiyey Labadiinii Waalid Jannada, isagoo ka siibi Dharkoodii inuu Tusiyo Xumaantooda (Cawrada) wuu idin Arkaa isaga iyo Colkiisu idinkuse ma aragtaan,

يَٰبَنِىٓ ءَادَمَ لَا يَفْتِنَنَّكُمُ ٱلشَّيْطَٰنُ كَمَآ أَخْرَجَ
أَبَوَيْكُم مِّنَ ٱلْجَنَّةِ يَنزِعُ عَنْهُمَا لِبَاسَهُمَا لِيُرِيَهُمَا
سَوْءَٰتِهِمَآ إِنَّهُۥ يَرَىٰكُمْ هُوَ وَقَبِيلُهُۥ مِنْ حَيْثُ

waxaana uga Yeelay Shaydaanka Sokeeya kuwaan Rumeynin Xaqa.

لَا تَرَوْنَهُمْ ۗ إِنَّا جَعَلْنَا الشَّيَاطِينَ أَوْلِيَاءَ
لِلَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ ﴿٢٧﴾

Wuxuu faray Eebe inay ka Baxaan Jannada iyagoo qaarkood qaar Col u Yahay, Iyagoo Dhulka ku Nagaan tan iyo Muddo, oy kuna Noolaan Dhexdiisa kuna Dhiman lagana soo Bixin, markaasuu Eebe uga warramay Dadka wuxuu ugu Nicmeeyey oo Dhar ay isku Asturaana iyo mid Xarrago, waxaase ka Khayr roon Dhawrsoonida si ay u Xusuustaan, wuxuuna uga Digay inuu Fidmeeyo Shaydaanku siduu Waalidkood Aadam iyo Xaawa uga saaray Janada, isagoo ka Siibay Dharkoodii, waxaana jira inuu Shaydaanku u Jeedo Dadka iyaguse ayan arkayn, Shaydaankuna wuxuu Saaxiib la yahay kuwaan Rumaynin Xaqa. Waxayna Aayaduhu Caddayn siduu Shaydaan Dadka Col ugu yahay, iyo inay ka Digtoonaadaan, iyo inay Xusuustaan sida Eebe u Arrad Bixiyey uguna soo Dejiyey Dhar ay isku Asturaan, Waxaase Muuqda in Dadka qaarkiis Jecelyahay isqaawinta, sida kuwa Dharka Gaabsaday iyo kuwa Xidhay Dharka Khafiifka ah ee aan wax asturayn, Taasoo ku tusin inta Diiday Shukriga Nicmada Eebe. Al-Acraaf (24-27).

---

28. Markay Falaan Xumaanna waxay Dhahaan waxaan ka Hellay Aabayaalkanno Eebaana na faray iyada, waxaad Dhahdaa Eebe ma faro Xumaan ma waxaad ku Dhahaysaan Eebe waxaydaan Ogayne.

وَإِذَا فَعَلُوا فَاحِشَةً قَالُوا وَجَدْنَا عَلَيْهَا آبَاءَنَا
وَاللَّهُ أَمَرَنَا بِهَا ۗ قُلْ إِنَّ اللَّهَ لَا يَأْمُرُ بِالْفَحْشَاءِ ۖ
أَتَقُولُونَ عَلَى اللَّهِ مَا لَا تَعْلَمُونَ ﴿٢٨﴾

29. Waxaad Dhahdaa wuxuu faraa Eebe Cadaaladda iyo inaad u Jeedisaan Wajigiinna (Xagiisa) Masaajidkasta Agtiisa, baryana idinkoo u kaliyeeli Diinta siduu idinku Billaabay Yaad ku soo Noqonaysaan.

قُلْ أَمَرَ رَبِّي بِالْقِسْطِ ۖ وَأَقِيمُوا وُجُوهَكُمْ عِنْدَ
كُلِّ مَسْجِدٍ وَادْعُوهُ مُخْلِصِينَ لَهُ الدِّينَ ۚ
كَمَا بَدَأَكُمْ تَعُودُونَ ﴿٢٩﴾

30. Koox wuu Hanuuniyey, Kooxna waxaa ku sugnaaday korkooda Baadi, maxaayelay waxay ka Yeesheen Shayaadiinta Awliyo, waxayna u Malayn inay hanuunsanyihiin.

فَرِيقًا هَدَىٰ وَفَرِيقًا حَقَّ عَلَيْهِمُ الضَّلَالَةُ ۗ إِنَّهُمُ
اتَّخَذُوا الشَّيَاطِينَ أَوْلِيَاءَ مِنْ دُونِ اللَّهِ
وَيَحْسَبُونَ أَنَّهُمْ مُهْتَدُونَ ﴿٣٠﴾

Waxaana wax lala yaaba ah in Markay Gaaladu Xumaan falaan Sheegaan inay Aabayaalkood ka soo gaadheen, Eebana faray Sidaas, Eebase ma faro Xumaan, mana haboona in Eebe lagu been abuurto.
Eebese wuxuu Faraa Cadaaladda, Salaad Dar Eebe ah, waxaana jirta inuu Eebe Dadka u soo Celin siduu ku Billaabay, Eebe wuxuu hanuuniyaa qaar, qaarna way dhumaan, Maxaa yeelay Shaydaan yey Sokeeye ka Yeesheen Eebe ka sokow iyagoo isu Malayn inay Hanuunsanyihiin, mana habboona in Cidna Xumaanta lagu Raaco ama Aabbo ha ahaado ama Cid kale ha ahaatee,
Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuuu Yidhi: Dadow waxaa laydiin soo Kulmin Eebe Idinkoo Kaba la‘, Qaawan, oon Gudnayn, Eebaa Yidhi: Saan ku Billownay yaan ku so Celinaynaa (Bukhaari iyo Muslim). Al-Acraaf (28-30).

31. Banii Aadamow qaata Quruxdiinna (Dharka) Masaajid kasta agtiisa, Cuna oo Cabbana hana xad gudbina Illeen Eebe ma Jecla kuwa xadgudubee.

۞ يَٰبَنِيٓ ءَادَمَ خُذُواْ زِينَتَكُمۡ عِندَ كُلِّ مَسۡجِدٖ وَكُلُواْ
وَٱشۡرَبُواْ وَلَا تُسۡرِفُوٓاْۚ إِنَّهُۥ لَا يُحِبُّ ٱلۡمُسۡرِفِينَ ٣١

32. Waxaadna Dhahdaa yaa Reebay Quruxdii Eebe u soo Bixiyey Addoomadiisa, iyo Wanaagga Rizqiga ah, waxaad Dhahdaa waxaa iska leh kuwa Rumeeyey Nolosha Adduunyo Dhexdeeda, Gaarna u tahay Maalinta Qiyaame, saasaana ugu Caddaynay Aayaadkanaga Ciddii wax Og.

قُلۡ مَنۡ حَرَّمَ زِينَةَ ٱللَّهِ ٱلَّتِيٓ أَخۡرَجَ لِعِبَادِهِۦ
وَٱلطَّيِّبَٰتِ مِنَ ٱلرِّزۡقِۚ قُلۡ هِيَ لِلَّذِينَ ءَامَنُواْ
فِي ٱلۡحَيَوٰةِ ٱلدُّنۡيَا خَالِصَةٗ يَوۡمَ ٱلۡقِيَٰمَةِۗ كَذَٰلِكَ
نُفَصِّلُ ٱلۡأٓيَٰتِ لِقَوۡمٖ يَعۡلَمُونَ ٣٢

33. Waxaad dhahdaa wuxuu uun Xarrimay Eebahay waxa Xun kan Muuqda iyo ka Qarsoonba, iyo Dambiga, iyo Xad Gudub Xaq darro iyo inaad la wadaajisaan Eebe wuxuusan Xujo u soo Dejinin, iyo inaad ku Sheegtaan Eebe waxaydaan Ogayn «Xaqnimadiisa».

قُلۡ إِنَّمَا حَرَّمَ رَبِّيَ ٱلۡفَوَٰحِشَ مَا ظَهَرَ مِنۡهَا وَمَا بَطَنَ
وَٱلۡإِثۡمَ وَٱلۡبَغۡيَ بِغَيۡرِ ٱلۡحَقِّ وَأَن تُشۡرِكُواْ بِٱللَّهِ مَا لَمۡ يُنَزِّلۡ
بِهِۦ سُلۡطَٰنٗا وَأَن تَقُولُواْ عَلَى ٱللَّهِ مَا لَا تَعۡلَمُونَ ٣٣

Waa in Cawrada la Asturo Marka la Cibaadaysan iyo mar walba, waxna la Cuno lana Cabbo Isagoon la Xadgudbayn, Illeen Eebe ma Jecla kuwa Xadgudbee, cid Xarrimi kartana ma jirto Quruxda iyo Wanaaga Risqiga ah ee Eebe u soo Saaray Dadka, Wanaaga way mudantahay Mu‘miniinta Adduunka, Gaarbayna u tahay Qiyaamada Saasuuna Eebe ugu Caddeeyey aayaadkiisa Ciddii wax kasi, Eebe wuxuu Xarrimaa Xumaanta mid Muuqata iyo mid qarsoonba iyo Dambiga, iyo Dulmiga Xaq Darro iyo in Eebe lala wadaajiyo waxaan Xujo lahayn iyo in Lagu sheego Eebe waxaan loo Cilmi lahayn. Aayaduhuna waxay ku Tusin in Wanaagana la falo Xumaantana laga Fogaado. Al-Acraaf (31-33).

---

34. Ummadkasta waxaa u sugnaaday Ajal (Muddo) markay Timaaddo Ajashuna kama dibmaraan Saacad kamana hor maraan.

وَلِكُلِّ أُمَّةٍ أَجَلٞۖ فَإِذَا جَآءَ أَجَلُهُمۡ لَا يَسۡتَـٔۡخِرُونَ
سَاعَةٗ وَلَا يَسۡتَقۡدِمُونَ ٣٤

35. Banii Aadamow hadday idiin yimaadaan Rasuullo idinka mida oo idiinka warrama Aayaadkayga Ciddiise Dhawrsata oo Wanaag Fasha, Cabsi ma Saarra mana Walbahaaraan.

يَٰبَنِيٓ ءَادَمَ إِمَّا يَأۡتِيَنَّكُمۡ رُسُلٞ مِّنكُمۡ يَقُصُّونَ
عَلَيۡكُمۡ ءَايَٰتِي فَمَنِ ٱتَّقَىٰ وَأَصۡلَحَ فَلَا خَوۡفٌ عَلَيۡهِمۡ
وَلَا هُمۡ يَحۡزَنُونَ ٣٥

36. Kuwa Beeniyey Aayaadkanaga oo iska Kibriya Xaggeeda kuwaasi waa Naarta Ehelkeeda wayna ku Waari.

وَٱلَّذِينَ كَذَّبُواْ بِـَٔايَٰتِنَا وَٱسۡتَكۡبَرُواْ عَنۡهَآ أُوْلَٰٓئِكَ
أَصۡحَٰبُ ٱلنَّارِۖ هُمۡ فِيهَا خَٰلِدُونَ ٣٦

37. Yaa ka Dulmi Badan Cid ku Abuuratay Eebe Been ama Beenisa Aayaadkiisa, kuwaasu waxay Heli qaybtoodii loo qoray, markay u Timaaddo Malaa'igtanada (Mawdka) oo Dili waxay ku Dhahaan Aaway waxaad Caabudayseen Eebe ka Sokow waxay Dhahaan way naga Dhumeen, waxayna ku marag Fureen Naftooda inay ahaayeen Gaalo.

فَمَنْ أَظْلَمُ مِمَّنِ افْتَرَىٰ عَلَى اللَّهِ كَذِبًا أَوْ كَذَّبَ بِآيَاتِهِ ۚ
أُولَٰئِكَ يَنَالُهُمْ نَصِيبُهُمْ مِنَ الْكِتَابِ ۖ حَتَّىٰ إِذَا جَاءَتْهُمْ
رُسُلُنَا يَتَوَفَّوْنَهُمْ قَالُوا أَيْنَ مَا كُنْتُمْ تَدْعُونَ
مِنْ دُونِ اللَّهِ ۖ قَالُوا ضَلُّوا عَنَّا وَشَهِدُوا
عَلَىٰ أَنْفُسِهِمْ أَنَّهُمْ كَانُوا كَافِرِينَ ﴿٣٧﴾

Eebe wuxuu u Yeelay Ummad kasta waqti ayna kana dib Dhacayn kana hor marayn, wuxuuna uga digay Khilaafidda Rasuuladiisa, Taasoo ah in Ciddii Dhawrsata oo wanaag fasha ayan Cabsi iyo Murug midna arkayn, Ciddiise Beenisa Aayaadka Eebe oo iskibrisana ay Naar gali kuna Waari, cid ka Dulmi badanna ma jirto Ruux ku Been abuurtay Eebe ama Beeniyey Aayaadkiisa, wuxuuna la Kulmi Camalkiisii iyo wixii loo yaboohay, markay Dhimanna Malaa'igtaa Canaanata oo warsata waxay Caabudi jireen oo Eebe ka soo hadhay, waxayna qirtaan Gaalnimadii iyagoo waxay Caabudayeen ka Maqnaaday, Taasna waxay Dadka uga digi inay wax Eebe ka soo hadhay wax ka Dayaan. Al-Acraaf (34-37).

---

38. Wuxuu Yidhi Eebe la gala Naarta Umado hortiin Tegay oo Jinni iyo Insiba leh, markastooy Umadu Gasho waxay Lacnadaa Walaasheed (Saaxiibkeed) markay isku haleelaan Dhammaantood Dhexdeedana waxay ku Dhahdaa Tan dambe wax (Raacda) Tan hore la (Raaco) Eebow kuwanaa na Dhumiyey ee u Laablaab Cadaab, Eebe wuxuu Odhan mid kasta waa loo Laablaabi mase Ogidin.

قَالَ ادْخُلُوا فِي أُمَمٍ قَدْ خَلَتْ مِنْ قَبْلِكُمْ مِنَ الْجِنِّ
وَالْإِنْسِ فِي النَّارِ ۖ كُلَّمَا دَخَلَتْ أُمَّةٌ لَعَنَتْ أُخْتَهَا ۖ
حَتَّىٰ إِذَا ادَّارَكُوا فِيهَا جَمِيعًا قَالَتْ أُخْرَاهُمْ
لِأُولَاهُمْ رَبَّنَا هَٰؤُلَاءِ أَضَلُّونَا فَآتِهِمْ عَذَابًا ضِعْفًا
مِنَ النَّارِ ۖ قَالَ لِكُلٍّ ضِعْفٌ وَلَٰكِنْ لَا تَعْلَمُونَ ﴿٣٨﴾

39. Waxay ku Odhan Tan hore Tan Dambi wax Dheeraada naguma lihidin ee Dhadhamiya Cadaabka waxaad kasbanayseen Darteed.

وَقَالَتْ أُولَاهُمْ لِأُخْرَاهُمْ فَمَا كَانَ لَكُمْ عَلَيْنَا
مِنْ فَضْلٍ فَذُوقُوا الْعَذَابَ بِمَا كُنْتُمْ تَكْسِبُونَ ﴿٣٩﴾

40. Kuwa Beeniyey Aayadkanaga oo iska Kibriyey looma Furo Iridaha Samada mana Galaan Janada intuu ka Galo Riti Irbad Dulkeed Saasaana ku abaal marinaa Dambiilayaasha,

إِنَّ الَّذِينَ كَذَّبُوا بِآيَاتِنَا وَاسْتَكْبَرُوا عَنْهَا لَا تُفَتَّحُ
لَهُمْ أَبْوَابُ السَّمَاءِ وَلَا يَدْخُلُونَ الْجَنَّةَ حَتَّىٰ يَلِجَ الْجَمَلُ
فِي سَمِّ الْخِيَاطِ ۚ وَكَذَٰلِكَ نَجْزِي
الْمُجْرِمِينَ ﴿٤٠﴾

41. Waxay ku Mudan Jahannamo Gogol korkoodana waxaa ahaan Dabool, Saasaana ku Abaal marinnaa Daalimiinta.

لَهُم مِّن جَهَنَّمَ مِهَادٌ وَمِن فَوْقِهِمْ غَوَاشٍ ۚ
وَكَذَٰلِكَ نَجْزِي الظَّالِمِينَ ﴿٤١﴾

Eebe wuxuu ku Odhan Gaalada Maalinta Qiyaame la gala Naarta Umado idinka horreeyey oo Jinni iyo Insiba leh, markay Naarta Galaanna inay Isnacladaan, Iyagoo Sheegi inay Dhumiyeen kuwaasu oyna warsan Eebe inuu u Laab Laabo Cadaabka, Dhammaantoodse waa loo Laab Laabi Cadaabka, Kan wax Dhumiyey iyo Kan La Dhumiyeyba mase, Oga, Calaacal iyo Qaylana wax uma tarto, kuwa Beeniyey Aayaadka Eebe oo iska Kibriyeyna Cirka looma Furo Janana ma Galaan inta Riti ka galo Irbad Dulkeed, waana Abaalka Dambiilayaasha, Jahannamaana Hoos iyo Korba ka jiri Taasoo ah Abaalka Daalimiinta. waxaana ku soo arooray Nafta Fiican iyo Tan Xun Xadiith Dheer oo Sheegi in Tan Fiican loo Furi Samada lana soo Dhaweyn, Tan Xunna laga Xidhi Samada iyadoo Suudh Xun leh. Eebaana ka Magan gallay Xumaan. Al-Acraaf (38-41).

---

42. Kuwa Rumeeyey Xaqa oo Falay Camal Fiican, kuma Mashaqaynno Naf waxayna Karin, Kuwaasu waa Janada Ehelkeeda wayna ku Dhex waari.

وَالَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ
لَا نُكَلِّفُ نَفْسًا إِلَّا وُسْعَهَا أُولَٰئِكَ أَصْحَابُ
الْجَنَّةِ ۖ هُمْ فِيهَا خَالِدُونَ ﴿٤٢﴾

43. Waxaana ka Siibnaa waxa ku Jira Laabtooda oo Xasada, waxaana Dareeri Hoostooda Wabiyadii, waxayna Dhahaan Mahad waxaa Mudan Eebaha Nagu Hanuuniyey Kan (Wanaagga) Maanaan hanuuneen haddaan Eebe na hanuunin, waxay la Timid Rasuuladii Eebaheen Xaq, waxaana loogu Dhawaaqay Tiinani waa Jannadii Laydin Dhaxalsiiyey Camalkiinna Dartiis.

وَنَزَعْنَا مَا فِي صُدُورِهِم مِّنْ غِلٍّ تَجْرِي مِن تَحْتِهِمُ
الْأَنْهَارُ ۖ وَقَالُوا الْحَمْدُ لِلَّهِ الَّذِي هَدَانَا لِهَٰذَا
وَمَا كُنَّا لِنَهْتَدِيَ لَوْلَا أَنْ هَدَانَا اللَّهُ ۖ لَقَدْ جَاءَتْ
رُسُلُ رَبِّنَا بِالْحَقِّ ۖ وَنُودُوا أَن تِلْكُمُ الْجَنَّةُ
أُورِثْتُمُوهَا بِمَا كُنتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿٤٣﴾

Markuu Eebe Sheegay Kuwii Xumaa wuxuu Raaciyey kuwii Liibaanay, waana kuwa Xaqa Rumeeyey ee Camal Fiican falay, kuwaasoo ku Waari Jannada, oo Wanaag ku Dhanyahay, isagoo laga Daahiriyey Xumaan iyo Xasadba, kuna Mahadin Eebahooda Hanuuniyey, Illeen Cidaan Eebe Hanuunin ma toosee, waxayna qiri in Rasuuladii Eebe Xaq la Yimaadeen, waxaana loogu Dhawaaqi inay Galaan Jannada iyagoo ku Dhaxli Camalkoodii Fiicnaa Dartiis.

Waxaa Xadiith ku Sugnaaday in markay Mu‘miniintu ka Nabadgalaan Naarta lagu Joojin Meel u Dhaxaysa Jannada iyo Naarta, markaasaa laysu Qisaasi waxay isku Dulmiyeen Adduunkii, markii la Daahiriyo yaa loo Idmi inay Galaan Jannada. Wuxuuna Nabigu (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Ku Dhaartay in mid kasta ka Garan Ogyahay Gurigiisa Janada in ka badan kii Addunka. Waxaa Wariyey (Bukhaari). Al-Acraaf (42-43).

---

44. Waxay u Dhawaaqaan Ehelu Jannuhu Ehelu Naarka waan hellay wixii Eebe Noo Yaboohay si Dhab ah ee

وَنَادَىٰ أَصْحَابُ الْجَنَّةِ أَصْحَابَ النَّارِ أَن قَدْ وَجَدْنَا
مَا وَعَدَنَا رَبُّنَا حَقًّا فَهَلْ وَجَدتُّم مَّا وَعَدَ رَبُّكُمْ حَقًّا ۖ

idinku ma Hesheen wuxuu idiin yaboohay Eebe si Dhab ah, waxayna Dhahaan haa waxaana ka dhawaaqa Dhexdooda mid Dhawaaqa Lacnadda Eebe ha ku Dhacdo Daalimiinta.

قَالُوا نَعَمْ فَأَذَّنَ مُؤَذِّنٌ بَيْنَهُمْ أَن لَّعْنَةُ اللَّهِ
عَلَى الظَّالِمِينَ ﴿٤٤﴾

45. Ah kuwa ka Celiya Dadka Jidka Eebe lana Doona Qallooca, Iyagoo Aakhiro ka Gaaloobay.

الَّذِينَ يَصُدُّونَ عَن سَبِيلِ اللَّهِ وَيَبْغُونَهَا عِوَجًا وَهُم
بِالْآخِرَةِ كَافِرُونَ ﴿٤٥﴾

46. Dhexdoodana waxaa ahaan Xijaab Acraafkana (Meel sare) waxaa ahaan Dad ku Garan Cid Kasta Calaamaddooda, waxayna u Dhawaaqaan Ehelu Jannaha iyagoo ku leh Nabadgalyo Korkiina ha ahaato, mayna galin Jannada wayse damci.

وَبَيْنَهُمَا حِجَابٌ وَعَلَى الْأَعْرَافِ رِجَالٌ يَعْرِفُونَ كُلًّا
بِسِيمَاهُمْ وَنَادَوْا أَصْحَابَ الْجَنَّةِ أَن سَلَامٌ عَلَيْكُمْ
لَمْ يَدْخُلُوهَا وَهُمْ يَطْمَعُونَ ﴿٤٦﴾

47. Markii loo Jeediyo Wajigooda Xagga Ehelu Naarka waxay dhahaaan Eebow ha na yeelin la Jirka Daalimiinta.

۞ وَإِذَا صُرِفَتْ أَبْصَارُهُمْ تِلْقَاءَ أَصْحَابِ النَّارِ قَالُوا رَبَّنَا
لَا تَجْعَلْنَا مَعَ الْقَوْمِ الظَّالِمِينَ ﴿٤٧﴾

**Ehelu Jannuhu wuxuu la hadli Ehelu Naarka iyagoo warsanaya inay Heleen wixii Eebe ugu Goodiyey ee Ciqaab ahaa, iyaguna way heleen wixii Wanaagahaa Ee Eebe u Yaboohay, Waxayna ugu Jawaabeen inay Heleen, markaasaa Dhexdooda lagu Dhawaaqay Lacnadu ha ku Dhacdo Daalimiinta Dadka ka leexiya Jidka Eebe oo Qallooca la rabta, Aakharana ka Gaalobay, waxaana u Dhaxeeya Xijaab, Acraafkana waxaa ah Dad ku garan Cid kasta Calaamaddeeda, waxayna ugu Dhawaaqaan Ehelu Jannaha Nabadgalyo korkiinna ha ahaato waana Dad aan wali galin Jannada Doonahayase, haddii loo Jeediyo Xagga Ehelu Naarkana waxay dhahaan Eebahanow ha na yeelin la jirka Daalimiinta.**
**Aayaduhuna waxay Caddayn sida loo kala Bixi Maalinta Aakharo, Cid walbana ay u heli wuxuu Eebe ugu Yaboohay una Camal falay, wax isku qasanna uusan u jirin, Eebana waa Kariim Caadila Awoodna badan (Eebaana Kariima). Al-Acraaf (44-47).**

---

48. Waxay u Dhawaaqayaan Dadka Acraafku Dad ay ku garan Calaamaddooda,waxayna ku Odhan waxba idiinma tarin badnaantiinii (Kulankiinnii) iyo Waxaad isku Kibrinayseen.

وَنَادَىٰ أَصْحَابُ الْأَعْرَافِ رِجَالًا يَعْرِفُونَهُم بِسِيمَاهُمْ
قَالُوا مَا أَغْنَىٰ عَنكُمْ جَمْعُكُمْ وَمَا كُنتُمْ
تَسْتَكْبِرُونَ ﴿٤٨﴾

49. Ma kuwanaa kuwaad ku Dhaarateen inaan Eebe Gaadhsiinayn (Siinayn) Naxariis (Waxaana lagu Odhan) Gala Janada idinkoon Cabsi iyo Walbahaar midna Arkayn.

أَهَٰؤُلَاءِ الَّذِينَ أَقْسَمْتُمْ لَا يَنَالُهُمُ اللَّهُ بِرَحْمَةٍ
ادْخُلُوا الْجَنَّةَ لَا خَوْفٌ عَلَيْكُمْ وَلَا أَنتُمْ
تَحْزَنُونَ ﴿٤٩﴾

50. Waxay u Dhawaaqi Ehelu Naarku Ehelu Jannaha (Iyagoo dhihi) Noogu

وَنَادَىٰ أَصْحَابُ النَّارِ أَصْحَابَ الْجَنَّةِ أَنْ أَفِيضُوا

soo Deeqa Biyaha ama waxa Eebe idinku Arzaaqay, waxayna Dhahaan Eebe wuu ka Xarrimay Labadaas Gaalada.

عليـنا من الماء أو مما رزقكم الله قالوا
إن الله حرمهما على الكافرين ﴿٥٠﴾

51. Ee ah kuwa ka Yeeshay Diintooda Madadalo iyo Ciyaar, oyna Dhagartay Nōlosha Adduunyo, Maanta wuu ku Dayn Naarta siday u Halmaameen la Kulanka Maalintan, iyo Diidadooda Aayaadkanaga Dartiis.

الذين اتخذوا دينهم لهوا ولعبا
وغرتهم الحياة الدنيا فاليوم ننساهم
كما نسوا لقاء يومهم هذا وما كانوا
بآياتنا يجحدون ﴿٥١﴾

Waxayna u Dhawaaqaan Dadka Acraafku Dad ay ku Garan Calaamaddooda oy kuna Dhihi waxba idiinma tarin waxaad kulminayseen iyo Waxaad kasbanayseen waana kuwaas kuwaad ku Dhaaranayseen inuusan Eebe Siinayn Naxariis, waxaana lagu Odhan Gala Janada idinkoon Cabsi iyo Murugo midna Arkayn, waana Dadkii Rumeeyey Xaqa, waxaase Dhawaaqay Ehelu Naarkii (Eebaan ka magan galaye) iyagoo ku Dhihi Ehelu Jannaha Biyaha wax naga siiya oo noogu Deeqa, iyo waxa Eebe idinku Arzaaqay waxayna dhahaan Eebaa ka Xarrimay Gaalada ka Yeeshay Diintooda Madadaalo iyo Ciyaar, oyna Dhagartay Nolosha adduunyo, Maalinta Qiyaamana waxaa lagu Dhex dayn Naarta siday u Halmaameen la Kulanka Maalintaas, Aayaadkana u Diideen. Al-Acraaf (48-51).

---

52. Dhab ahaan baannu ugula Nimid Kitaab Aannu Caddaynay Annagoo ku Cilmi leh, Isagoo Hanuun iyo Naxariis u ah Ciddii Rumayn.

ولقد جئناهم بكتاب فصلناه على علم هدى
ورحمة لقوم يؤمنون ﴿٥٢﴾

53. Miyey Sugi waxaan ahayn wuxuu Sheegi Quraanku, Maalintuu Yimaaddo wuxuu Sheegi Quraanku waxay Odhan kuwii Horay u Halmaamay (Kuna Camal falin) waxay la Timid Rasuuladii Eebe Xaq, ee majiraa Shufaco ha noo Shafeeceene, ama ma nala Celin inaan Fallo waxaan ahayn waxaan fali jirray, waxay Khasaariyeen Naftooda waxaana ka Dhumay waxay been abuuran jireen.

هل ينظرون إلا تأويله يوم يأتي تأويله يقول
الذين نسوه من قبل قد جاءت رسل ربنا
بالحق فهل لنا من شفعاء فيشفعوا لنا أو نرد
فنعمل غير الذي كنا نعمل قد خسروا أنفسهم
وضل عنهم ما كانوا يفترون ﴿٥٣﴾

54. Eebihiin waa kan ku Abuuray Samooyinka iyo Dhulka Lix Maalmood kuna istawooday Carshiga, wuxuuna ku Daboolaa Habeenka Maalinta wuuna doonaa Habeenku si Deg dega Qorraxda, Dayaxa iyo Xidigahana waxaa loo Sakhiray Amarka Eebe, Eebaana Abuuridda iyo Amarkaba iska leh,

إن ربكم الله الذي خلق السماوات والأرض
في ستة أيام ثم استوى على العرش يغشي
الليل النهار يطلبه حثيثا والشمس والقمر
والنجوم مسخرات بأمره ألا له الخلق

waxaana waynaaday «oo Khayrbatay» Eebaha barbaariya Caalamka.

وَٱلْأَمْرُ ۗ تَبَارَكَ ٱللَّهُ رَبُّ ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿٥٤﴾

Eebe wuxuu soo Dejiyey Kitaabka Quraanka ah oo Cad, Wanaagna ku Dhanyahay, Gaalase waxay Xaqiiqada Dhabta ah ogaan markuu u Yimaaddo Wuxuu sheegi oo Xaq ah, waxaana Khasaari Ciddii iska Nacday oon ku Camal falin oo iska halmaantay, waxayna ku Calaacali inay Rasuuladii Eebe Xaq ula yimaadeen, Yaase u Shafeeci ama u Celin Addunkii si ay Camal fiican u falaan,. Aayadda kale waxay ka warrami Awoodda Eebe iyo Siduu u Abuuray Cirka, Dhulka, Qorraxda, Dayaxa, iyo Xidigahaba, uguna Sugnaaday Abuuridda iyo amarkuba, waana Eebana wayn ee Khayrka badan Caalamkana Eebe u ah. Aayaddana kama Muuqdo wax Eebe Khalqigiisa ku dhaweeya, Jidka Xaqa ah ee Toosanna waa in la raaco Jidkii hore ee Suubanaa.
Wuxuu Yidhi Nucaym Binu Xamaad Sheekhii Bukhaari: Ciddii Eebe u ekaysiisa Dadka wuu Gaaloobay, Ciddii Diidda wax Eebe Isku Tilmaamayna wuu Gaaloobay, wuxuu Eebe isku Sheegay ama Rasuulkiisu ku Tilmaamay u ekaysiin ma leh, waana in Eebe Xumaan laga Dheereeyo Wanaagna lagu Tilmaamo. Al-Acraaf (52-54).

---

55. U barya Eebihiin si Khashuuc ah iyo Qarsoodi Illen Eebe ma jecla kuwa Xad gudbee.

ٱدْعُوا۟ رَبَّكُمْ تَضَرُّعًا وَخُفْيَةً ۚ إِنَّهُۥ لَا يُحِبُّ
ٱلْمُعْتَدِينَ ﴿٥٥﴾

56. Hana fasaadinina Dhulka inta la Wanaajiyey ka dib, Baryana Eebe Cabsi iyo Doonidba Naxariista Eebana waxay u Dhawdahay kuwa Samaha Fala.

وَلَا تُفْسِدُوا۟ فِى ٱلْأَرْضِ بَعْدَ إِصْلَٰحِهَا
وَٱدْعُوهُ خَوْفًا وَطَمَعًا ۚ إِنَّ رَحْمَتَ ٱللَّهِ قَرِيبٌ
مِّنَ ٱلْمُحْسِنِينَ ﴿٥٦﴾

57. Eebe waa kan u dira Dabaysha Bishaaro Naxariistiisa (Roobka) hortiisa markay Xambaarto Daruur Culusna waxaan u Kaxaynaa Dhul Dhintay (Abaar) waxaana ku Dejinaa (Shubnaa) Biyaha, waxaana ku soo Bixinaa Midho Kasta, saasaana u soo Bixinaa wixii Dhintay inaad Xusuusataan.

وَهُوَ ٱلَّذِى يُرْسِلُ ٱلرِّيَٰحَ بُشْرًۢا بَيْنَ يَدَىْ
رَحْمَتِهِۦ ۖ حَتَّىٰٓ إِذَآ أَقَلَّتْ سَحَابًا ثِقَالًا سُقْنَٰهُ
لِبَلَدٍ مَّيِّتٍ فَأَنزَلْنَا بِهِ ٱلْمَآءَ فَأَخْرَجْنَا بِهِۦ مِن كُلِّ
ٱلثَّمَرَٰتِ ۚ كَذَٰلِكَ نُخْرِجُ ٱلْمَوْتَىٰ لَعَلَّكُمْ
تَذَكَّرُونَ ﴿٥٧﴾

58. Dhulka Fiican wuxuu ku soo baxaa Doogiisu idinka Eebe, midka Xunna waxaan Dhib ahayn kuma soo baxo, saasaan ugu Caddaynaa Aayadka Ciddii ku Shukrin Eebe.

وَٱلْبَلَدُ ٱلطَّيِّبُ يَخْرُجُ نَبَاتُهُۥ بِإِذْنِ رَبِّهِۦ ۖ وَٱلَّذِى
خَبُثَ لَا يَخْرُجُ إِلَّا نَكِدًا ۚ كَذَٰلِكَ نُصَرِّفُ
ٱلْءَايَٰتِ لِقَوْمٍ يَشْكُرُونَ ﴿٥٨﴾

Eebe waa in loo Baryaa si Habboon, Dhulka waa in wanaag lagu joogaa oon la fasaadin inta Eebe wanaajiyey ka dib, Eebe waa in lagu Xidhnaado Illeen Naxariistiisu waxay u Dhawdahay sama falayaashee, Wuxuu Nabigu (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) ku yidhi: Asaxaabta: Dadyahow u dhimriya Naftiinna idinku uma Dhawaaqaysaan Eebe Dhaga la' ama Maqane, Eebahaad baryeysaan waa Maqle Dhaw.
Aayadaha kale waxay ka warrami sida Eebe ugu Nicmeeyey Addoomadiisa Roobna ugu keeno, uguna Nooleeyo Dhul Dhintay, uguna soo Bixiyo Doog iyo Barwaaqo si ay Calaamo ugu Noqoto Awoodda Eebe iyo inuu soo Nooleeyn karo wixii Dhintay, Dadkuna waxay la mid Yihiin Dhulka oo midna Khayrbaa ka imaan oo Xaquu Raaci sida Dhul Roob wax ka soo saaray, midna waa Xaqdiide sida Dhul Xun oon wax soo Dhalinayn, Taasina Dadkaa loo Caddayn inay wax gartaan. Al-Acraaf (55-58).

59. Waxaan u Dirray Nabi Nuux Qoomkiisii, wuxuuna ku Yidhi Qoomkayow Caabuda Eebe idiinma sugna Eebe ka soo hadhaye, anugu waxaan idiinka Cabsan Cadaab Maalin Wayn.

لَقَدْ أَرْسَلْنَا نُوحًا إِلَىٰ قَوْمِهِۦ فَقَالَ يَٰقَوْمِ ٱعْبُدُوا۟
ٱللَّهَ مَا لَكُم مِّنْ إِلَٰهٍ غَيْرُهُۥٓ إِنِّىٓ أَخَافُ عَلَيْكُمْ
عَذَابَ يَوْمٍ عَظِيمٍ ﴿٥٩﴾

60. Waxay Dheheen Madaxdii Qoomkiisa ka mid ahayd waxaan kugu Aragnaa Baadi Cad.

قَالَ ٱلْمَلَأُ مِن قَوْمِهِۦٓ إِنَّا لَنَرَىٰكَ فِى ضَلَٰلٍ
مُّبِينٍ ﴿٦٠﴾

61. Wuxuuna yidhi Qoomkayow Baadi kuma Sugni waxaanse ahay Rasuul Eebaha Caalamka.

قَالَ يَٰقَوْمِ لَيْسَ بِى ضَلَٰلَةٌ وَلَٰكِنِّى رَسُولٌ
مِّن رَّبِّ ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿٦١﴾

62. Waxaana idiin Gaadhsiin Farriinta Eebahay waana idiin Naseexayn, waxaana ka Ogahay Xagga Eebe waxaydaan Ogayn.

أُبَلِّغُكُمْ رِسَٰلَٰتِ رَبِّى وَأَنصَحُ لَكُمْ
وَأَعْلَمُ مِنَ ٱللَّهِ مَا لَا تَعْلَمُونَ ﴿٦٢﴾

63. Ma waxaad la Yaabteen inuu u Yimaaddo Nin idinka mida Xuska Eebihiin si uu idiinku digo iyo inaad dhawrsataan laydiinna Naxariisto.

أَوَعَجِبْتُمْ أَن جَآءَكُمْ ذِكْرٌ مِّن رَّبِّكُمْ عَلَىٰ رَجُلٍ
مِّنكُمْ لِيُنذِرَكُمْ وَلِتَتَّقُوا۟ وَلَعَلَّكُمْ تُرْحَمُونَ ﴿٦٣﴾

64. Wayse Beeniyeen waxaana ku korinay Nuux iyo intii la jirtay Doontii waxaana Maanshaynay kuwii Beeniyey Aayaadkanaga, Illeen waxay ahaayeen Qoom indhala, (Xaqa arkayn).

فَكَذَّبُوهُ فَأَنجَيْنَٰهُ وَٱلَّذِينَ مَعَهُۥ فِى ٱلْفُلْكِ وَأَغْرَقْنَا
ٱلَّذِينَ كَذَّبُوا۟ بِـَٔايَٰتِنَآ إِنَّهُمْ كَانُوا۟
قَوْمًا عَمِينَ ﴿٦٤﴾

**Quraanku wax badan yuu ka warramay Nabi Nuux iyo Nabiyada kalaba, siday Xaqa u Gaadhsiiyeen Dadkii iyo siday u Beeniyeen, Iyagoo Nabiyadu Nasteex u ah Qoomkoodii, iyaguna ka Madax adaygi, waxaase loo Baahanyahay in lagu Waano qaato, Xaqana la raaco, Maxayse Noqotay Cidhibtii Qoomkii Nabi Nuux in la halaago oo Biyo iyo Duufaan lagu Maansheeyo, Nabi Nuux iyo Intii raacdayna ay Nabad galaan oo u Hadhaan Dhulkii Iyagoo Doon koray.**
**Maxamed Binu Isxaaq wuxuu Yidhi: Nabi Nuux wuxuu la kulmay cid la kulantay ma jirto Nabi la Dilay mooyee.**
**Ibnu Cabbaasna wuxuu yidhi: Qoomkii Nabi Nuux waa qoomkii ugu horreeyey ee Caabuda Sanam. Ujeeddadu waa in Xaqa la Raaco, Xumaantana laga leexdo si loo Liibaano. Al-Acraaf (59-64).**

---

65. Waxaan u Dirray Caadna Walaalkood (Nabi) Huud wuxuuna yidhi Qoomkayow Caabuda Eebe idiinma sugna Eebe ka soo hadhay, Miyeydaan Dhawrsanayn.

۞ وَإِلَىٰ عَادٍ أَخَاهُمْ هُودًا ۗ قَالَ يَٰقَوْمِ ٱعْبُدُوا۟ ٱللَّهَ
مَا لَكُم مِّنْ إِلَٰهٍ غَيْرُهُۥٓ ۚ أَفَلَا تَتَّقُونَ ﴿٦٥﴾

66. Waxay Dheheen Madaxdii Gaalowday oo Qoomkiisa ka mid ah, Anagu waxaan kugu aragnaa Safaaho (Xumaan) waxaana kuu malaynaynaa Beenaalayaasha.

قَالَ ٱلْمَلَأُ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ مِن قَوْمِهِۦٓ
إِنَّا لَنَرَىٰكَ فِى سَفَاهَةٍ وَإِنَّا لَنَظُنُّكَ
مِنَ ٱلْكَٰذِبِينَ ﴿٦٦﴾

67. Wuxuuna yidhi Qoomkayow Safaaho (Xumaan) imahayso waxaanse ahay Rasuul Eebaha Caalamka.

قَالَ يَٰقَوۡمِ لَيۡسَ بِي سَفَاهَةٞ وَلَٰكِنِّي رَسُولٞ
مِّن رَّبِّ ٱلۡعَٰلَمِينَ ٦٧

68. Waxaana idin gaadhsiin Farrinta Eebahay waxaana idiin ahay Nasteex Aamina.

أُبَلِّغُكُمۡ رِسَٰلَٰتِ رَبِّي وَأَنَا۠ لَكُمۡ نَاصِحٌ أَمِينٌ ٦٨

69. Ma waxaad la Yaabteen inuu u Yimaaddo Xuska Eebihiin Nin idinka mid ah inuu idiin Digo, Xusuusta Markuu idinka yeelay Eebe kuwa u Hadhay (Dhulka) Qoomkii Nabi Nuux ka dib, idiinna kordhiyey Xoog, ee Xusuusta Nicmada Eebe, waxaad u Dhawdihiin inaad Liibaantaane.

أَوَعَجِبۡتُمۡ أَن جَآءَكُمۡ ذِكۡرٞ مِّن رَّبِّكُمۡ عَلَىٰ رَجُلٖ
مِّنكُمۡ لِيُنذِرَكُمۡۚ وَٱذۡكُرُوٓاْ إِذۡ جَعَلَكُمۡ
خُلَفَآءَ مِنۢ بَعۡدِ قَوۡمِ نُوحٖ وَزَادَكُمۡ فِي ٱلۡخَلۡقِ
بَصۜۡطَةٗۖ فَٱذۡكُرُوٓاْ ءَالَآءَ ٱللَّهِ لَعَلَّكُمۡ
تُفۡلِحُونَ ٦٩

Sidoo kale wuxuu Eebe u diray Caad Nabi Huud, waana Caadkii hore, wuxuuna ku Waaniyey inay Eebe kaliya uun Caabudaan, Dhawrsadaanna Illeen Eebe kale ma lehe, Madaxdiise way Gaaloobeen oo Diideen Xaqii oo Xumaan iyo Caqli yari ku sheegeen Nabigii, wuxuuse u Sheegay inuusan Caqli Xumayn, ee uu Yahay Rasuul Eebaha Caalamka, Gaadhsiinna Farriinta Eebe Yahayna Nasteex Aamina, oyna habboonayn inay la yaabaan in waxyi lagu soo Dejiyo Nin ka mid ah inuu u Digo, wuxuuna Xusuusiyey in Eebe ka Yeelay kuwo ka soo hadhay kana dambeeya Qoomkii Nabi Nuux, Xoogna Eebe u Yeelay, oyna Waajibna ku tahay inay Xusuustaan Nicmooyinka Eebe, inay Liibaanaan. Taasina waxay ku Tusin inay xaqa iyo Xumaantu Dagaalamaan had iyo jeer, Wanaaguna Hadho Xumaantuna Tirtiranto.
Taasoo Muujin in Xaqa lagu sugnaado, Xumaantana laga Leexdo. Al-Acraaf (65-69).

---

70. Waxay Dheheen ma waxaad noola timid inaan Caabudno Eebe Kaliya, oon ka Tagno Waxay Caabudayeen Aabayaalkanno, noo keen waxaad noogu Goodiyeysay Haddaad runle tahay.

قَالُوٓاْ أَجِئۡتَنَا لِنَعۡبُدَ ٱللَّهَ وَحۡدَهُۥ وَنَذَرَ
مَا كَانَ يَعۡبُدُ ءَابَآؤُنَا فَأۡتِنَا بِمَا تَعِدُنَآ
إِن كُنتَ مِنَ ٱلصَّٰدِقِينَ ٧٠

71. wuxuu yidhi waxaa idinkaga Dhacaya Xagga Eebe Cadaab iyo Cadho ma waxaad igula Murmaysaan Magacyo ood Magacoowdeen idinka iyo Aabayaalkiin oon Eebe u soo Dejinin Xujo, Suga anna waan idinla Sugiye.

قَالَ قَدۡ وَقَعَ عَلَيۡكُم مِّن رَّبِّكُمۡ رِجۡسٞ
وَغَضَبٌۖ أَتُجَٰدِلُونَنِي فِيٓ أَسۡمَآءٖ
سَمَّيۡتُمُوهَآ أَنتُمۡ وَءَابَآؤُكُم مَّا نَزَّلَ ٱللَّهُ
بِهَا مِن سُلۡطَٰنٖۚ فَٱنتَظِرُوٓاْ إِنِّي مَعَكُم
مِّنَ ٱلۡمُنتَظِرِينَ ٧١

72. Markaasaan Korinay isaga iyo Intii la jirtay Naxariistanadada Darteed,

فَأَنجَيۡنَٰهُ وَٱلَّذِينَ مَعَهُۥ بِرَحۡمَةٖ مِّنَّا وَقَطَعۡنَا

دَابِرَ الَّذِينَ كَذَّبُوا بِآيَاتِنَا ۖ وَمَا كَانُوا مُؤْمِنِينَ ﴿٧٢﴾

waxaana Goynay Cidhibta kuwa Beeniyey Aayaadkanaga, mana ayan Rumayn (Xaqa).

**Nabi Huud iyo Nabiyada kalaba waxay la Yimaadeen in Eebe kaliya la Caabudo, haseyeeshee way la Yaabeen Gaaladii Caad, waxayna diideen inay ka tagaan waxay Aabayaalkood Caabudi Jireen, waxaase ku Dhacay Ciqaab iyo Cadho Eebe, Illeen Cilmi la'aan yey ku Murmeen Eebe iyo Xaqiiye, waxaana la Cidhibtiray intii Beenisay Xaqa ee Gaalada ahayd, Sidii lagu halaagayna waxaa Caddeeyey Aayado kale oo badan, oo Tilmaami sidii loo halaagay markay kibreen oo Xaqii Beeniyeen, Taasuna waa u Digid Ciddii marta waddadoodii, oo Xaqa ka Madax adaygta, Cid Xoog iyo Tabar ku Faani kartana ma jirto Illeen Dad waa Miskiin Tabar yare. Al-Acraaf (70-72).**

---

وَإِلَىٰ ثَمُودَ أَخَاهُمْ صَالِحًا ۗ قَالَ يَا قَوْمِ اعْبُدُوا اللَّهَ مَا لَكُم مِّنْ إِلَٰهٍ غَيْرُهُ ۖ قَدْ جَاءَتْكُم بَيِّنَةٌ مِّن رَّبِّكُمْ ۖ هَٰذِهِ نَاقَةُ اللَّهِ لَكُمْ آيَةً ۖ فَذَرُوهَا تَأْكُلْ فِي أَرْضِ اللَّهِ ۖ وَلَا تَمَسُّوهَا بِسُوءٍ فَيَأْخُذَكُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿٧٣﴾

73. Waxaan u Dirray Thamuudna Walaalkood Nabi Saalax, wuxuuna yidhi Qoomkayow Caabuda Eebe wax ka soo hadhay Eebe idiinma sugnee, waxaa idiinka timid Xagga Eebe Xujo (Cad) Tanna waa Hashii Eebe, waxayna idiin tahay Calaamo, ee iska Daaya ha ka Cunto Dhulka Eebe hana ku taabanina Xumaan oo markaas idin qabto Cadaab Daran.

وَاذْكُرُوا إِذْ جَعَلَكُمْ خُلَفَاءَ مِن بَعْدِ عَادٍ وَبَوَّأَكُمْ فِي الْأَرْضِ تَتَّخِذُونَ مِن سُهُولِهَا قُصُورًا وَتَنْحِتُونَ الْجِبَالَ بُيُوتًا ۖ فَاذْكُرُوا آلَاءَ اللَّهِ وَلَا تَعْثَوْا فِي الْأَرْضِ مُفْسِدِينَ ﴿٧٤﴾

74. Xusuusta markuu idinka yeelay (Eebe) kuwo Baddalay Caad kadib idin Dajiyeyna Dhulka idinkoo ka Yeelay Dooxyaheeda Daaro, ood kana qoranaysaan Buuraheeda Guryo Xusuusta Nicmooyinka hana Fasaadinina Dhulka.

قَالَ الْمَلَأُ الَّذِينَ اسْتَكْبَرُوا مِن قَوْمِهِ لِلَّذِينَ اسْتُضْعِفُوا لِمَنْ آمَنَ مِنْهُمْ أَتَعْلَمُونَ أَنَّ صَالِحًا مُّرْسَلٌ مِّن رَّبِّهِ ۚ قَالُوا إِنَّا بِمَا أُرْسِلَ بِهِ مُؤْمِنُونَ ﴿٧٥﴾

75. Waxayna ku dheheen Madaxdii Iskibrisay oo Qoomkiisa ka mida kuwii Tabarta yaraa oo Rumeeyey ma waxaad Ogtihiin in Saalax laga soo diray Xagga Eebe, waxayna dheheen Annagu waxa lagu diray waan rumaynay.

قَالَ الَّذِينَ اسْتَكْبَرُوا إِنَّا بِالَّذِي آمَنتُم بِهِ كَافِرُونَ ﴿٧٦﴾

76. Waxayna dheheen kuwii iskibriyey annagu waxaad Rumeeyseen waan ka Gaaloownay.

**Reer Thamuud waxay ahaayeen qoom Caraba oo loo soo Diray Nabi Saalax, Wuxuuna Faray inay Eebe kaliya Caabudaan una sheegay in Hasha loo soo diray ay Calaamo u tahay, oyna nabadgaliyaan, Xusuustaanna Nicmooyinkii Eebe, Dhulkana ayan Fasaadin, waxaase iskibriyey sidii Caadada ahayd kuwii Madaxda ahaa, iyagoo warsan warsi Xun in (Nabi) Saalax laga soo diray, waxayna Caddeeyeen inay diideen waxa lagu soo diray Nabi Saalax, Mu'miniintiise waxay Caddeeyeen inay Xaqa Rumeeyeen, Saas darteed waa inaan Cidna ismoodin inay iyadu Xaqa ka sarrayso ama Awood leedahay, Illeen Xaqaa Mudan in la raacee. Al-Acraaf (73-76).**

77. Waxayna Dileen Hashii waxayna ka Madaxadaygeen amarkii Eebahood, waxayna dheheen Saalaxow noo keen waxaad noogu Goodiyeeyso haddaad tahay mid la soo Diray.

فَعَقَرُوا۟ ٱلنَّاقَةَ وَعَتَوْا۟ عَنْ أَمْرِ رَبِّهِمْ
وَقَالُوا۟ يَـٰصَـٰلِحُ ٱئْتِنَا بِمَا تَعِدُنَآ إِن كُنتَ
مِنَ ٱلْمُرْسَلِينَ ﴿٧٧﴾

78. Waxaana qabtay Gariirkii waxayna ahaadeen kuwo, Guryahoodii ku Dhintay.

فَأَخَذَتْهُمُ ٱلرَّجْفَةُ فَأَصْبَحُوا۟ فِى دَارِهِمْ
جَـٰثِمِينَ ﴿٧٨﴾

79. Wuxuuna ka Jeedsaday «Nabi Saalax» xaggooda wuxuuna yidhi waan idin Gaadhsiiyey Fariintii Eebahay waana idiin Naseexeeyey Mase Jeclidiin Nasteexa.

فَتَوَلَّىٰ عَنْهُمْ وَقَالَ يَـٰقَوْمِ لَقَدْ أَبْلَغْتُكُمْ
رِسَالَةَ رَبِّى وَنَصَحْتُ لَكُمْ وَلَـٰكِن لَّا تُحِبُّونَ
ٱلنَّـٰصِحِينَ ﴿٧٩﴾

Waxay Caddayn Aayaduhu inay Dileen Hashii, inkastoo la Sheegay in Nin kaliya Dilay Haddana waxay Aayaddu Sheegtay in Dhammaan wax ka Dileen Illeen Raallibay ka ahaayeen Dilkeedee, waxayna ku Dambeeyeen in Dhul gariir lagu halaagay, oy Guryahoodi ku Bakhtiyeen, Nabi Saalaxna wuxuu Sheegay inuu ku Dadaalay siday Xaqa u Rumayn lahaayeen uguna Naseexeeyey mase Jeclayn kuwa Naseexeeya. Taasina waxay Caddayn in Ciddii Xaqa iyo Naseexada Diida ay la Kulmi Ciqaab iyo Halaag, waxaa kale oo ay ku Tusin inay Waajibtahay in Jidka Toosan la Raaco, Xumaantana laga Leexdo. Al-Acraaf (77-79).

---

80. Xusuuso Nabi Luudh Markuu ku yidhi Qoomkiisii Ma waxaad la imaanaysaan Xumaanta uusan idiinka hormarin Ruux Caalamka ka mid ah.

وَلُوطًا إِذْ قَالَ لِقَوْمِهِۦٓ أَتَأْتُونَ ٱلْفَـٰحِشَةَ
مَا سَبَقَكُم بِهَا مِنْ أَحَدٍ مِّنَ ٱلْعَـٰلَمِينَ ﴿٨٠﴾

81. Idinku waxaad u Tagaysaan Ragga Hunguriyeeyn Darteed Haweenka ka sokow, waxaadse tihiin qoom Xad Gudbay.

إِنَّكُمْ لَتَأْتُونَ ٱلرِّجَالَ شَهْوَةً مِّن دُونِ
ٱلنِّسَآءِ ۚ بَلْ أَنتُمْ قَوْمٌ مُّسْرِفُونَ ﴿٨١﴾

82. Waxayna ahayd Jawaabtii qoomkiisa, ka Bixiya Luudh iyo inta Rumaysay Magaaladiinna waaba Dad isdaahirinaye.

وَمَا كَانَ جَوَابَ قَوْمِهِۦٓ إِلَّآ أَن قَالُوٓا۟
أَخْرِجُوهُم مِّن قَرْيَتِكُمْ ۖ إِنَّهُمْ أُنَاسٌ
يَتَطَهَّرُونَ ﴿٨٢﴾

83. Waana Korinay Luudh iyo Ehelkiisa Haweenaydiisii mooyee oo ka mid noqotay kuwa halaag ku hadhay.

فَأَنجَيْنَـٰهُ وَأَهْلَهُۥٓ إِلَّا ٱمْرَأَتَهُۥ كَانَتْ
مِنَ ٱلْغَـٰبِرِينَ ﴿٨٣﴾

84. Waxaana ku soo Daadinay Roob (Naareed) bal day siday Noqotay Cidhibtii Dambiilayaasha.

وَأَمۡطَرۡنَا عَلَيۡهِم مَّطَرٗاۖ فَٱنظُرۡ كَيۡفَ كَانَ
عَٰقِبَةُ ٱلۡمُجۡرِمِينَ ﴿٨٤﴾

Qoomkii Nabi Luudhna waxay ahaayeen kuwa Akhlaaq Xun, oo Haweenka ka Leexda oo Ragga aada, Markuu ka Waaniyeyna waxay isfareen in Luudh iyo inta Rumaysay laga Bixiyo Magaalada, iyagoo ku Caayey inay Yihiin kuwo Nadiifa,Eebaase Halaagay,Nabadna Galiyey Nabi Luudh iyo intii Rumaysay. waxaadna halkaas ku aragtaan in marka Akhlaaqdu Xumaato ay Dadka iskaga darman Wanaagga iyo Xumaantu.
Goormayse Nadaafaddu Ceeb noqotay, waana wax la yaab leh in Wanaag laysku Caayo.
Qataadana wuxuu Yidhi: Way Caayeen Ceeb la'aan. Al-Acraaf (80-84).

---

85. Madyanna waxaan u Diray Walaalkood Nabi Shucayb wuxuuna yidhi Qoomkayow Caabuda Eebe idiinma sugna Eebe ka soo hadhaye, waxaa idiinka Timid Xagga Eebe Xujee Dhammaystirana Miisidda iyo Miisaanka, hana ka Nusqaaminina Dadka waxooda, hana Fasaadinina Dhulka wanaajin kadib, saasaa idiin khayr roon haddaad Mu'miniin tihiin.

وَإِلَىٰ مَدۡيَنَ أَخَاهُمۡ شُعَيۡبٗاۗ قَالَ يَٰقَوۡمِ
ٱعۡبُدُواْ ٱللَّهَ مَا لَكُم مِّنۡ إِلَٰهٍ غَيۡرُهُۥۖ قَدۡ
جَآءَتۡكُم بَيِّنَةٞ مِّن رَّبِّكُمۡۖ فَأَوۡفُواْ
ٱلۡكَيۡلَ وَٱلۡمِيزَانَ وَلَا تَبۡخَسُواْ ٱلنَّاسَ
أَشۡيَآءَهُمۡ وَلَا تُفۡسِدُواْ فِي ٱلۡأَرۡضِ
بَعۡدَ إِصۡلَٰحِهَاۚ ذَٰلِكُمۡ خَيۡرٞ لَّكُمۡ
إِن كُنتُم مُّؤۡمِنِينَ ﴿٨٥﴾

86. Hana Fadhiisanina Jid kasta idinkoo Goodin oo ka Celin Dadka Jidka Eebe Ciddii Rumaysa idinkoo Qallooc la dooni, xusuustana markaad yareydeen oo Eebe idin badiyey, dayana siday Noqotay Cidhibtii Fasaadiyaasha.

وَلَا تَقۡعُدُواْ بِكُلِّ صِرَٰطٖ تُوعِدُونَ
وَتَصُدُّونَ عَن سَبِيلِ ٱللَّهِ مَنۡ ءَامَنَ بِهِۦ
وَتَبۡغُونَهَا عِوَجٗاۚ وَٱذۡكُرُوٓاْ
إِذۡ كُنتُمۡ قَلِيلٗا فَكَثَّرَكُمۡۖ وَٱنظُرُواْ
كَيۡفَ كَانَ عَٰقِبَةُ ٱلۡمُفۡسِدِينَ ﴿٨٦﴾

87. Haddayse Koox idinka mida Rumaysay waxa laygu soo Diray Kooxna ayna Rumeynin Samra (Suga) inta Eebe ka kala Xugmin Dhexdeenna Isagaa Xaakim Khayr Roon ah.

وَإِن كَانَ طَآئِفَةٞ مِّنكُمۡ ءَامَنُواْ بِٱلَّذِيٓ
أُرۡسِلۡتُ بِهِۦ وَطَآئِفَةٞ لَّمۡ يُؤۡمِنُواْ فَٱصۡبِرُواْ حَتَّىٰ
يَحۡكُمَ ٱللَّهُ بَيۡنَنَاۚ وَهُوَ خَيۡرُ ٱلۡحَٰكِمِينَ ﴿٨٧﴾

Waxaa lagu Sheegay Madyan inay ahaayd Meel u Dhaw Magaalada Macaan ee Urdun, wuxuuna ka waaniyey Nabi Shucayb inayna Nusqaaminin Miisidda iyo Miisaanidda, Dadkana Khayaamin, Dhulkana ayan Fasaadin Wanaajin kadib, Jidkana ayan Fadhiisan iyagoo Xaqa Dadka ka Celin iyagoo Qallooc la raba, iyagoo laga rabo inay Xusuustaan sida Eebe u Badiyey iyagoo yaraa, haddayse Kooxu rumaysay Xaqa midna Beenisay ha la sugo inta Eebe ka kala Xukumo illeen isagaa Xaakim khayr Roon ah.
Waxayna aayaduhu ku Tusin Xumaan falka Qoomkaas, maxayse ka heleen oon ahayn waxa aayaduhu Sheegi doonaan oo Ciqaab darana. Al-Acraaf (85-87).

88. Waxay dheheen Madaxdii Iskibrisay oo Qoomkiisii ah waxaannu kaa Bixin Shucaybow adiga iyo kuwa ku Rumeeyey Magaaladanada ama waxaad ku soo Noqon Diintanada, wuxuuna yidhi oo haddaan Necebnahayna.

۞ قَالَ ٱلْمَلَأُ ٱلَّذِينَ ٱسْتَكْبَرُوا۟ مِن قَوْمِهِۦ لَنُخْرِجَنَّكَ
يَٰشُعَيْبُ وَٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ مَعَكَ مِن قَرْيَتِنَآ أَوْ لَتَعُودُنَّ
فِى مِلَّتِنَا ۚ قَالَ أَوَلَوْ كُنَّا كَٰرِهِينَ ﴿٨٨﴾

89. Waxaan ku Been abuuranay Eebe hadaan ku noqonno Diintiinna inta Eebe naga Koriyey ka dib, Nagumana habboona inaan ku Noqonno in Eebe Doono Mooyee, Illeen Eebaa Cilmigiisu waasac yahaye, waxaana talo Saarannay Eebe, Eebow Nagu kala Xukun Dhexdanada Xaq adaa Xaakim Khayr Roon ahe.

قَدِ ٱفْتَرَيْنَا عَلَى ٱللَّهِ كَذِبًا إِنْ عُدْنَا فِى مِلَّتِكُم
بَعْدَ إِذْ نَجَّىٰنَا ٱللَّهُ مِنْهَا ۚ وَمَا يَكُونُ لَنَآ أَن نَّعُودَ فِيهَآ
إِلَّآ أَن يَشَآءَ ٱللَّهُ رَبُّنَا ۚ وَسِعَ رَبُّنَا كُلَّ شَىْءٍ عِلْمًا ۚ
عَلَى ٱللَّهِ تَوَكَّلْنَا ۚ رَبَّنَا ٱفْتَحْ بَيْنَنَا وَبَيْنَ قَوْمِنَا
بِٱلْحَقِّ وَأَنتَ خَيْرُ ٱلْفَٰتِحِينَ ﴿٨٩﴾

Aayadahan waxay ka warrami waxay la qaabileen Nabi Shuceyb iyo inta la jirtay oo Mu‘miniinta ah, oyna ugu Gooddiyeen inay ka Eryi Magaaladooda haddayna ku soo Laaban Diinta, ku Noqoshada Diintoodana waxay ula Jeedaan Dadkii ka baxay ee Raacay Nabi Shucayb iyo Xaqa Illeen Nabi Shucayb marna diintooda ma haysane, ugu Dambayntii way Diideen Mu‘miniintii Warkii Gaalada mar Hadduu Eebe ka koriyey, waxayna talo saarteen Eebahood kana baryeen inuu si Xaq ah ku kala Xukumo iyaga iyo Gaalada Xaqa Diiday, Taasina waxay ku Tusin inay Waajibtahay in Xaqa lagu sugnaado laguna Dhaganaado, Eebana la talo saarto isagaa Xaakim Caadil ahe oo cid walba Marin waxay Mudantahaye. Al-Acraaf (88-89).

---

90. Waxayna Dheheen Madaxdii Gaalowday oo Qoomkiisii ka mida haddaad Raacdaan Shucayb waad Khasaarteen.

وَقَالَ ٱلْمَلَأُ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ مِن قَوْمِهِۦ لَئِنِ ٱتَّبَعْتُمْ
شُعَيْبًا إِنَّكُمْ إِذًا لَّخَٰسِرُونَ ﴿٩٠﴾

91. Waxaase qabtay Gariir waxayna ahaayeen kuwo Guryahoodii ku Dhintay (Iyagoo lagdan).

فَأَخَذَتْهُمُ ٱلرَّجْفَةُ فَأَصْبَحُوا۟ فِى دَارِهِمْ
جَٰثِمِينَ ﴿٩١﴾

92. Kuwii Beeniyey Shucayb waxaad Mooddaa inayna ku Nagaanin Magaaladaas Dhexdeeda, kuwii Beeniyey Shucaybna iyaga umbaa Khasaaray.

ٱلَّذِينَ كَذَّبُوا۟ شُعَيْبًا كَأَن لَّمْ يَغْنَوْا۟ فِيهَا ۚ ٱلَّذِينَ
كَذَّبُوا۟ شُعَيْبًا كَانُوا۟ هُمُ ٱلْخَٰسِرِينَ ﴿٩٢﴾

93. Markaasuu isaga Jeedsaday oo yidhi Qoomkayow waan idin Gaadhsiiyey Fariintii Eebahay waana idiin

فَتَوَلَّىٰ عَنْهُمْ وَقَالَ يَٰقَوْمِ لَقَدْ أَبْلَغْتُكُمْ
رِسَٰلَٰتِ رَبِّى وَنَصَحْتُ لَكُمْ ۖ فَكَيْفَ ءَاسَىٰ

Naseexeeyey ee sideen ugu walbahaari Qoom Gaala ah.

عَلَىٰ قَوْمٍ كَٰفِرِينَ ﴿٩٣﴾

Eebe wuxuu ka Warrami Gaalnimadooda iyo Madax adaygooda iyo waxay Dhexdabaalan oo Baadinimo ah, iyagoo isaga Digay Raacidda nabi Shucayb oo ay Khasaare ku Sheegeen, waxaase qabatay Gariir waxayna ku Dhinteen Guryahoodii waxaadna moodaa inayna Xaq Diidayaashu ku Nagaanin Halkaan, Khasaarana iyaga umbuu ku Dhacay, Nabi Shucaybna wuu Isaga Jeedsaday Isagoo Sheegay inuu Gaadhsiiyey Fariintii Eebe una Naseexeeyey uusanna u Murgaynin, Wax loo calaacalana ma aha Cid intii Xaqa si Cad loo Gaadhsiiyey looguna Sharaxay Haddana Diidda, Dulmi, Madax adayg, Xaq diiddo iyo Dhibid Dadka Toosan iyo Xaqaba. Al-Acraaf (90-93).

---

94. Magaalo Kasta oon Nabi u dirraba waxaan ku Qabanay Ehelkeeda Cudurro iyo Dhibaato inay Khushuucaan (oo Baryaan Eebe).

وَمَآ أَرْسَلْنَا فِى قَرْيَةٍ مِّن نَّبِىٍّ إِلَّآ أَخَذْنَآ أَهْلَهَا
بِٱلْبَأْسَآءِ وَٱلضَّرَّآءِ لَعَلَّهُمْ يَضَّرَّعُونَ ﴿٩٤﴾

95. Markaasaan u Baddallaa meejii Xumaan (Dhibka) Wanaag (Khayr) intay ka Bataan oy Dhahaan waxaa taabtay Aabayaalkaanno Dhibaato iyo Farax, Markaasaan ku Qabannaa kado Iyagoon Ogayn.

ثُمَّ بَدَّلْنَا مَكَانَ ٱلسَّيِّئَةِ ٱلْحَسَنَةَ حَتَّىٰ عَفَوا۟
وَّقَالُوا۟ قَدْ مَسَّ ءَابَآءَنَا ٱلضَّرَّآءُ وَٱلسَّرَّآءُ
فَأَخَذْنَٰهُم بَغْتَةً وَهُمْ لَا يَشْعُرُونَ ﴿٩٥﴾

96. Hadday Dadka Magaalooyinku Rumeeyaan (Xaqa) oo Dhawrsadaan waxaan ku Furi lahayn korkooda (Sii dayn lahayn) Barakada Samada iyo Dhulka, wayse Beeniyeen (Xaqii) Waana qabanay waxay kasbanayeen Dartiis.

وَلَوْ أَنَّ أَهْلَ ٱلْقُرَىٰٓ ءَامَنُوا۟ وَٱتَّقَوْا۟ لَفَتَحْنَا
عَلَيْهِم بَرَكَٰتٍ مِّنَ ٱلسَّمَآءِ وَٱلْأَرْضِ وَلَٰكِن
كَذَّبُوا۟ فَأَخَذْنَٰهُم بِمَا كَانُوا۟ يَكْسِبُونَ ﴿٩٦﴾

97. Miyey ka aamin Noqdeen Dadka Magaaladu inuu u Yimaaddo Dhibkanaga Habeenkii iyagoo Hurda.

أَفَأَمِنَ أَهْلُ ٱلْقُرَىٰٓ أَن يَأْتِيَهُم بَأْسُنَا بَيَٰتًا
وَهُمْ نَآئِمُونَ ﴿٩٧﴾

98. Miyeyse ka aamin yihiin Dadka Magaaladu inuu u Yimaaddo Dhibkanagu Barqinkii iyagoo Ciyaari.

أَوَأَمِنَ أَهْلُ ٱلْقُرَىٰٓ أَن يَأْتِيَهُم بَأْسُنَا ضُحًى
وَهُمْ يَلْعَبُونَ ﴿٩٨﴾

99. Ma waxay ka aamin Noqdeen Dhibka Eebe, cid khasaartay yaa ka aamin Noqota Ciqaabta iyo Dhibka Eebe.

أَفَأَمِنُوا۟ مَكْرَ ٱللَّهِ ۚ فَلَا يَأْمَنُ مَكْرَ ٱللَّهِ
إِلَّا ٱلْقَوْمُ ٱلْخَٰسِرُونَ ﴿٩٩﴾

Adduunku waa Guri Imtixaam, Dadkana waxaa lagu Imtixaamaa Dhib iyo Khayrba inay Xusuustaan Eebe, haddii kale wuxuu ku qaban Eebe kado iyagoon Ogayn, Hadduu Dadku toosnaado oo Xaqa Raaco wuxuu Eebe ugu Deeqi lahaa Khayr iyo Barwaaqo, waxayse Beeniyeen Xaqii waxaana lagu ciqaabay Dambigooda Dartiis, mana haboona in laga aamin noqdo Ciqaabta Eebe Illeen waxaa suurawda in Ciqaabta Eebe u Timaaddo Habeen ay Hurdaan ama Maalin ay Ciyaari, Illeen cid Khasaartay umbaa ka Aamin Noqota oon Xil iska saarin ka Dhawrsashada Ciqaabta Eebe.
Waxaana Xadiith ah: Mu‘minka Xaalkiisu waa Khayr, hadday Dhib ku dhacdo wuu samraa Khayrna wuu u Noqdaa, Hadduu Wanaag helana wuu Mahdiyaa oo Khayr u Noqdaa. Waana in saas loo Gartaa Xaalka Eebana lagu Tiirsanaadaa. Al-Acraaf (94-99).

100. Miyeyna u Caddaanin kuwa Dhaxlaya Dhulka Ehelkiisa (Halaagiisa) ka dib haddaan doono Waan qaban lahayn Dambigooda Dartiis, oon Dabooli lahayn Quluubtooda oyna wax Maqlin.

أَوَلَمْ يَهْدِ لِلَّذِينَ يَرِثُونَ ٱلْأَرْضَ مِنۢ بَعْدِ
أَهْلِهَآ أَن لَّوْ نَشَآءُ أَصَبْنَٰهُم بِذُنُوبِهِمْ ۚ
وَنَطْبَعُ عَلَىٰ قُلُوبِهِمْ فَهُمْ لَا يَسْمَعُونَ ﴿١٠٠﴾

101. Taasi waa Magaalooyinkii waxaana kaaga qisoonaynaa warkoodii, waxayna ula timid Rasuuladii Xujooyin mana ayan Rumayn Beenintooda darteed horay, saasuuna u Daabacaa Eebe quluubta Gaalada.

تِلْكَ ٱلْقُرَىٰ نَقُصُّ عَلَيْكَ مِنْ أَنۢبَآئِهَا ۚ وَلَقَدْ
جَآءَتْهُمْ رُسُلُهُم بِٱلْبَيِّنَٰتِ فَمَا كَانُوا۟ لِيُؤْمِنُوا۟
بِمَا كَذَّبُوا۟ مِن قَبْلُ ۚ
كَذَٰلِكَ يَطْبَعُ ٱللَّهُ عَلَىٰ قُلُوبِ ٱلْكَٰفِرِينَ ﴿١٠١﴾

102. Kamaanaan helin badankooda Ballan, waxaanse ka hellay badankood iyagoo Faasiqiina.

وَمَا وَجَدْنَا لِأَكْثَرِهِم مِّنْ عَهْدٍ ۖ وَإِن وَجَدْنَآ
أَكْثَرَهُمْ لَفَٰسِقِينَ ﴿١٠٢﴾

Eebe wuxuu halaagaa Ciddii Isla Waynaata oo Xaqa Beenisa, waxaase Habboon in Ciddii Dhaxasha ay Waajibtahay inuu Toosnaado oo Hanuunsanaado si ayna ugu Dhicin Ciqaabta Eebe, sidii Qoomkii Nabi Nuux, Nabi Huud, Nabi Saalax, Nabi Luudh, iyo Nabi Shucayb, oo Dhammaantood Nabiyadu ula Yimaaddeen Xujooyin Cad, Badankooduna Xaqiibay Diideen, waxayna Muteen in la Daabaco Quluubtooda Fasiqiiinna noqdaan, Taasina waxay Caddayn in Xaqa la Raaco, lana digtoonaado, lana Toosnaado. Al-Acraaf (100-102).

---

103. Markaasaan la Bixinay Nabi Muuse Aayaadkanaga Xagga Fircoon iyo Qoomkiisii wayna Dulmiyeen (Diideen) ee day Siday Noqotay Cidhibtii Mufsidiinta.

ثُمَّ بَعَثْنَا مِنۢ بَعْدِهِم مُّوسَىٰ بِـَٔايَٰتِنَآ إِلَىٰ فِرْعَوْنَ
وَمَلَإِي۟هِۦ فَظَلَمُوا۟ بِهَا ۖ فَٱنظُرْ كَيْفَ كَانَ عَٰقِبَةُ
ٱلْمُفْسِدِينَ ﴿١٠٣﴾

104. Wuxuuna Yidhi (Nabi) Muuse Fircoonow Anagu Rasuul Eebaha Caalamkaan ahay.

وَقَالَ مُوسَىٰ يَٰفِرْعَوْنُ إِنِّى رَسُولٌ مِّن رَّبِّ
ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿١٠٤﴾

105. Waxaana Dhab ah inaan Eebe ka Sheegayn waxaan Xaq ahayn, waxaana idiin la imid Xujo Eebihiin ee u daa Banii Israa‘iil la Jirkayga.

حَقِيقٌ عَلَىٰٓ أَن لَّآ أَقُولَ عَلَى ٱللَّهِ إِلَّا ٱلْحَقَّ ۚ قَدْ
جِئْتُكُم بِبَيِّنَةٍ مِّن رَّبِّكُمْ فَأَرْسِلْ مَعِىَ بَنِىٓ
إِسْرَٰٓءِيلَ ﴿١٠٥﴾

106. Wuxuuna yidhi (Fircoon) haddaad la Timid Aayad keen haddaad Run Sheegi.

قَالَ إِن كُنتَ جِئْتَ بِـَٔايَةٍ فَأْتِ بِهَآ إِن كُنتَ
مِنَ ٱلصَّٰدِقِينَ ﴿١٠٦﴾

107. Markaasuu Tuuray Ushiisii markaasay soo Baxday iyadoo Mas Cad ah.

فَأَلْقَىٰ عَصَاهُ فَإِذَا هِىَ ثُعْبَانٌ مُّبِينٌ ﴿١٠٧﴾

108. Wuxuuna Siibay Gacantiisii markaasay soo Baxday iyadoo u Cad Dadka Eegi.

وَنَزَعَ يَدَهُۥ فَإِذَا هِىَ بَيْضَآءُ لِلنَّـٰظِرِينَ ١٠٨

Nabi Muuse wuxuu Eebe u diray Fircoon iyo Qoomkiisii isagoo Aayado wata, wayse Beeniyeen oo diideen, wuxuuna u sheegay Fircoon inuu Rasuul Eebe yahay Dhabna waxaan Xaq ahayn uusan Sheegayn, Xujana uu la yimid uuna warsaday inuu u Daayo Banii Israa‘iil, wuxuuse Codsaday Fircoon sidii Caadada u ahayd inuu Xujo Keeno hadduu Run Sheegi, wuxuuse u Muujiyey Ushii oo Mas Noqotay iyo Gacantiisa oo Cad Cudur la‘aan.
Qisaduna saasay ku socotaa inta laga halaago Fircoon iyo Colkiisii Xumaa. Al-Acraaf (103-108).

---

109. Waxay dheheen Madaxdii qoomkii Fircoon ka mida kani waa sixirroow aad u yaqaanna.

قَالَ ٱلْمَلَأُ مِن قَوْمِ فِرْعَوْنَ إِنَّ هَـٰذَا لَسَـٰحِرٌ عَلِيمٌ ١٠٩

110. wuxuuna Dooni inuu idinka Bixiyo Dhulkiinna ee Maxaad Faraysaan.

يُرِيدُ أَن يُخْرِجَكُم مِّنْ أَرْضِكُمْ ۖ فَمَاذَا تَأْمُرُونَ ١١٠

111. waxayna Dheheen dib u Dhig (Xaalkiisa) iyo Walaalkiis una dir Magaalooyinka kuwo soo kulmiya.

قَالُوٓا۟ أَرْجِهْ وَأَخَاهُ وَأَرْسِلْ فِى ٱلْمَدَآئِنِ حَـٰشِرِينَ ١١١

112. oo kuu Keena Sixir badane kasta aadna u yaqaanna.

يَأْتُوكَ بِكُلِّ سَـٰحِرٍ عَلِيمٍ ١١٢

113. Waxayna u Yimaaddeen Sixirlayaashii Fircoon waxayna Dheheen Ujuuro maleenahay haddaan annagu Adkaanno.

وَجَآءَ ٱلسَّحَرَةُ فِرْعَوْنَ قَالُوٓا۟ إِنَّ لَنَا لَأَجْرًا إِن كُنَّا نَحْنُ ٱلْغَـٰلِبِينَ ١١٣

114. Wuxuuna yidhi haa, waxaadna noqonaysaan kuwa la soo Dhaweeyo.

قَالَ نَعَمْ وَإِنَّكُمْ لَمِنَ ٱلْمُقَرَّبِينَ ١١٤

115. Waxayna dheheen Muusow ama Tuur ama aan tuurro.

قَالُوا۟ يَـٰمُوسَىٰٓ إِمَّآ أَن تُلْقِىَ وَإِمَّآ أَن نَّكُونَ نَحْنُ ٱلْمُلْقِينَ ١١٥

116. Wuxuuna yidhi Tuura, markay Tuureenna waxay Sixreen Indhaha Dadka wayna Cabsi galiyeen waxayna la yimaadeen Sixir wayn.

قَالَ أَلْقُوا۟ ۖ فَلَمَّآ أَلْقَوْا۟ سَحَرُوٓا۟ أَعْيُنَ ٱلنَّاسِ وَٱسْتَرْهَبُوهُمْ وَجَآءُو بِسِحْرٍ عَظِيمٍ ١١٦

Saasaad u aragtaa markuu Dambiile Fircoon Xaqii Beeniyey inuu Madaxdii Ka ag dhawaydna ay ku raaceen Beenintii iyagoo ku sheegi Nabi Muuse inuu Dooni inuu Dadka Dhulka ka Bixiyo Taasoo ay rabeen inay Dadka Khaldaan, waxayna Dadkii ku Dheheen wax na fara idinkaa idinka amar qaadanaynaaye, waxayna u soo Jeediyeen in la sugo Muuse iyo Walaalkii,Dadka la soo kulmiyo Cid kastoo Sixir Taqaanna Timaaddo, wayna u Yimaaddeen Fircoon Iyagoo warsan Ujuuro hadday Adkaadaan, wuxuuna ugu yaboohay Ujuuro iyo waliba u Dhawaansho, waxayna Tuureen wax ay Indhaha Dadka ku Sixreen kuna Cabsi galiyeen oo wayn. Taasina waxay ku Tusin Xaalkii Fircoon iyo Colkiisii ee Xumaa Khaldanaana. Al-Acraaf (109-116).

117. Waxaana u Waxyoonay (Nabi) Muuse Tuur Ushaada, waxayna soo Baxday inay Cunto waxay Dhoobdhoobeen.

۞ وَأَوْحَيْنَآ إِلَىٰ مُوسَىٰٓ أَنْ أَلْقِ عَصَاكَ ۖ فَإِذَا هِىَ
تَلْقَفُ مَا يَأْفِكُونَ ﴿١١٧﴾

118. Waxaana Sugnaaday Xaqii waxaana Buray waxay Falayeen.

فَوَقَعَ ٱلْحَقُّ وَبَطَلَ مَا كَانُوا۟ يَعْمَلُونَ ﴿١١٨﴾

119. Waxaana lagaga Adkaaday Gaaladii halkaas, waxayna noqdeen iyagoo Dullaysan.

فَغُلِبُوا۟ هُنَالِكَ وَٱنقَلَبُوا۟ صَـٰغِرِينَ ﴿١١٩﴾

120. Waxaana loo riday Sixirlayaashii Sujuud.

وَأُلْقِىَ ٱلسَّحَرَةُ سَـٰجِدِينَ ﴿١٢٠﴾

121. Waxayna Dheheen waxaan Rumeynay Eebaha Caalamka.

قَالُوٓا۟ ءَامَنَّا بِرَبِّ ٱلْعَـٰلَمِينَ ﴿١٢١﴾

122. Eebaha Muuse iyo Haaruun.

رَبِّ مُوسَىٰ وَهَـٰرُونَ ﴿١٢٢﴾

123. Wuxuuna yidhi Fircoon Miyaad rumeyseen Muuse, Idan ka hor, Arrintani waa Dhagar aad ku Dhagarteen Magaalada si aad uga Bixisaan Xaggeeda Dadkeeda, waad ogaan doontaan.

قَالَ فِرْعَوْنُ ءَامَنتُم بِهِۦ قَبْلَ أَنْ ءَاذَنَ لَكُمْ ۖ إِنَّ هَـٰذَا
لَمَكْرٌ مَّكَرْتُمُوهُ فِى ٱلْمَدِينَةِ لِتُخْرِجُوا۟ مِنْهَآ أَهْلَهَا ۖ
فَسَوْفَ تَعْلَمُونَ ﴿١٢٣﴾

124. Waxaan u gooyn Gacmihiinna iyo Lugahiinna isdhaaf waana idin Wadhi Dhamaantiin.

لَأُقَطِّعَنَّ أَيْدِيَكُمْ وَأَرْجُلَكُم مِّنْ خِلَـٰفٍ
ثُمَّ لَأُصَلِّبَنَّكُمْ أَجْمَعِينَ ﴿١٢٤﴾

125. Waxayna Dheheen Xagga Eebahanaa u Noqonaynaa.

قَالُوٓا۟ إِنَّآ إِلَىٰ رَبِّنَا مُنقَلِبُونَ ﴿١٢٥﴾

126. Waxaad nagu nacayso oon ahayn inaan Rumaynay Aayaadka Eebahanno ma jiro, markay noo Timid, Eebow samir naga Buuxi na dilna anagoo Muslimiina.

وَمَا تَنقِمُ مِنَّآ إِلَّآ أَنْ ءَامَنَّا بِـَٔايَـٰتِ رَبِّنَا لَمَّا جَآءَتْنَا ۚ
رَبَّنَآ أَفْرِغْ عَلَيْنَا صَبْرًا وَتَوَفَّنَا مُسْلِمِينَ ﴿١٢٦﴾

Waxaa Sugnaaday Xaqii Xumaantiina waa Burtay, Gaaladiina waa laga Adkaaday iyagoo Dullaysan, Sixirlayaashiina way Rumeeyeen Xaqii, wuxuuse ku Guul guulay Fircoon Arrintaas, wuxuuna sheegay inay rumeeyeen Xaqa Isagoon u idmin, wuxuuna ugu goodiyey inuu Ciqaabi oo Gooyn Gacmaha iyo Lugaha, Wadhina, wayse Calool adaygeen Eebana warsadeen Samir iyo Adkaysi Illeen waxaan Xaqa Rumayntiisa ahayn Fircoon kuma Nicine, Kuna oofsado Eebe iyagoo Muslimiina.
Waana kaas Xaqa Xumaan Waligeed, waana kaas Fircoon iyo Isla waynidiisii, waana kaas Xaq oo lagu sugnaado iyo Rumayn aayaadkiisa Dhaba. Al-Acraaf (117-126).

---

127. Waxay Dheheen Madaxdii oo Qoonkii Fircoona ma ku Dayn Muuse iyo Qoomkiisa inay Fasaadiyaan Dhulka inuu ku daayo adiyo Cibaadadaada

وَقَالَ ٱلْمَلَأُ مِن قَوْمِ فِرْعَوْنَ أَتَذَرُ مُوسَىٰ وَقَوْمَهُۥ
لِيُفْسِدُوا۟ فِى ٱلْأَرْضِ وَيَذَرَكَ وَءَالِهَتَكَ ۚ قَالَ

(iyo ILaahyadaada). wuxuuna yidhi waxaannu Dili Wiilashooda waxaannu dayn Gabdhahooda anagaana ka sarrayna oo Dullayn.

سَنُقَتِّلُ أَبْنَاءَهُمْ وَنَسْتَحْيِي نِسَاءَهُمْ وَإِنَّا فَوْقَهُمْ
قَاهِرُونَ ﴿١٢٧﴾

128. Muusana wuxuu ku yidhi Qoomkiisa Kaalmaysta Eebe, samrana Dhulka Eebaa iska leh wuxuuna dhaxalsiin Cidduu doono oo addoomadiisa ka mida, Cidhibta (Fiicanna) waxaa iska leh kuwa Dhawrsada.

قَالَ مُوسَىٰ لِقَوْمِهِ اسْتَعِينُوا بِاللَّهِ وَاصْبِرُوا ۖ
إِنَّ الْأَرْضَ لِلَّهِ يُورِثُهَا مَنْ يَشَاءُ
مِنْ عِبَادِهِ ۖ وَالْعَاقِبَةُ لِلْمُتَّقِينَ ﴿١٢٨﴾

129. Waxayna ku dhaheen waa nala Dhibay ka hor Imaatinkaaga iyo ka dib Imaatinkaaga, wuxuuna (Nabi Muuse) ku Yidhi waxay u Dhawdahay in Eebihiin halaago Cadawgiinna oo Dhulka idinku reebo si uu u Eego waxaad Fashaan.

قَالُوا أُوذِينَا مِنْ قَبْلِ أَنْ تَأْتِيَنَا وَمِنْ بَعْدِ
مَا جِئْتَنَا ۚ قَالَ عَسَىٰ رَبُّكُمْ أَنْ يُهْلِكَ
عَدُوَّكُمْ وَيَسْتَخْلِفَكُمْ فِي الْأَرْضِ
فَيَنْظُرَ كَيْفَ تَعْمَلُونَ ﴿١٢٩﴾

Madaxdii Xumayd ee Fircoon ka ag Dhawayd waxay Fircoon u Jeediyeen arrin ah ma waxaad dayn Muuse iyo Qoomkiisa inay Fasaadiyaan Dhulka adna ay kuu Daayaan ILaahyadaada, waxaana la sheegay in Fircoon lahaa ILaahyo uu qarsoodi ku Caabudi jiray, wuxuuse ugu Jawaabay waxay rabeen oo ah inuu Layn Wiilasha oo Dayn Gabdhaha inuu ku Shaqaysto ee u rooni ma aha, wuxuuna ku faanay inuu Muuse iyo Qoomkiisa ka Adagyahay kana sarreeyo, waana faan Jaahil aan wax garanayn.
Nabi Muuse isagu wuxuu u Jeedsaday Xagga Eebe wuxuuna faray Qoomkiisa inay Kaalmaystaan Eebe Samraanna Ogaadaanna in Dhulka Eebe Leeyahay una reebi Cidduu doono oo Addoomadiisa ka mida Cidhibta Fiicanna ay yeelan kuwa dhawrsada, waxaase Calaacalay Qoomkiisii oo sheegay in mar kasta la Dhibay, wuxuuna ku Calool adkaysiiyey inay u dhawdahay in Eebe Halaago Cadowgooda oo Dhulka iyaga u reebo Imtixaan dartiis iyo inuu Eego waxay falaan, wana taas Xaqa iyo Xumaan iyo Mu'min iyo Gaal Xaalkiisu. Al-Acraaf (127-129).

---

130. Waxaan ku qabanay Fircoon Ehelkiisii Abaar iyo Nusqaan Midhaha inay wax Xusuustaan.

وَلَقَدْ أَخَذْنَا آلَ فِرْعَوْنَ بِالسِّنِينَ وَنَقْصٍ
مِنَ الثَّمَرَاتِ لَعَلَّهُمْ يَذَّكَّرُونَ ﴿١٣٠﴾

131. Hadduu Wanaag u Yimaaddo waxay Dhahaan anaa leh tan (Mudan), hadday Dhibaato ku Dhacdana waxay sharaystaan Muuse iyo inta la jirta, Baaskoodu wuxu uun jiraa Eebe Agtiisa, badankooduse ma Oga.

فَإِذَا جَاءَتْهُمُ الْحَسَنَةُ قَالُوا لَنَا هَٰذِهِ ۖ وَإِنْ تُصِبْهُمْ
سَيِّئَةٌ يَطَّيَّرُوا بِمُوسَىٰ وَمَنْ مَعَهُ ۗ أَلَا إِنَّمَا
طَائِرُهُمْ عِنْدَ اللَّهِ وَلَٰكِنَّ أَكْثَرَهُمْ
لَا يَعْلَمُونَ ﴿١٣١﴾

132. Waxayna dheheen wax kasta oo aayad ah ood noola timaaddo inaad nagu Sixirto anagu kuma rumaynayno.

وَقَالُوا مَهْمَا تَأْتِنَا بِهِ مِنْ آيَةٍ لِتَسْحَرَنَا بِهَا فَمَا
نَحْنُ لَكَ بِمُؤْمِنِينَ ﴿١٣٢﴾

133. Markaasaan ku Dirray Daad, Ayax, injir iyo: Rah iyo Dhiig aayaad Cad iyagoo ah, wayna iskibriyeen waxayna ahaayeen Qoom Dambii-layaal ah.

فَأَرْسَلْنَا عَلَيْهِمُ ٱلطُّوفَانَ وَٱلْجَرَادَ وَٱلْقُمَّلَ
وَٱلضَّفَادِعَ وَٱلدَّمَ ءَايَٰتٍ مُّفَصَّلَٰتٍ فَٱسْتَكْبَرُوا۟
وَكَانُوا۟ قَوْمًا مُّجْرِمِينَ ١٣٣

134. Markuu ku Dhacay korkooda Cadaabku waxay dheheen Muusow noo Bari Eebahaa wuxuu kugula Ballamay, haddaad naga fayddo Cadaabka waannu ku Rumayn, waxaana la diri (u dayn) la jirkaaga Banii Israa‘iil.

وَلَمَّا وَقَعَ عَلَيْهِمُ ٱلرِّجْزُ قَالُوا۟ يَٰمُوسَى ٱدْعُ لَنَا
رَبَّكَ بِمَا عَهِدَ عِندَكَ ۖ لَئِن كَشَفْتَ عَنَّا
ٱلرِّجْزَ لَنُؤْمِنَنَّ لَكَ وَلَنُرْسِلَنَّ مَعَكَ بَنِىٓ
إِسْرَٰٓءِيلَ ١٣٤

135. Markaan ka faydnay Cadaabkii tan iyo Muddo ay Gaadhayaan yey ahaadeen kuwo Buriya (Ballankii).

فَلَمَّا كَشَفْنَا عَنْهُمُ ٱلرِّجْزَ إِلَىٰٓ أَجَلٍ
هُم بَٰلِغُوهُ إِذَا هُمْ يَنكُثُونَ ١٣٥

Eebe wuxuu ku qabtay Fircoon iyo Qoomkiisii Abaar iyo Beerihii oo ka Nusqaamay Bal inay Waantoobaan, waxaase dhacday in marka Wanaag u yimaadana ay Sheegtaan inay Mudanyihiin, haddii Xumaani Taabatana ay Baasaystaan Nabi Muuse iyo inta la jirta, mase oga in Dhibaatadu uga imaan Xagga Eebe, markaasay caddeeyeen warkii oo u Sheegeen Nabi Muuse iyo Dadkii Rumeeyey wax kasta oo calaamada oo loo keeno inayna Rumaynayn, Markaasaa Eebe ku sii daayey Daad, Cayayaan, Rah, Ayax iyo Dhiig oo ah Calaamooyin Cad cad, wayse iska kibriyeen, waxayna noqdeen Dambiilayaal, Markuu dhibku ku Dhacayna waxay u Sheegeen Nabi Muuse in Haddii Dhibka laga faydo ay Rumayn Xaqa, wayse Beeniyeen Ballankii,
Taasina waxay ku Tusin Awoodda Eebe iyo siduu wax u Ciqaabo, iyo Xumaanta Gaalada iyo Madax adaygooda, waxaase haboon in Xaqa la Raaco. Al-Acraaf (130-135).

---

136. Waan ka aarsannay Gaaladii waxaana ku Maanshaynay Badda Illeen waxay beeniyeen Aayaadkanaga, wayna Halmaameen.

فَٱنتَقَمْنَا مِنْهُمْ فَأَغْرَقْنَٰهُمْ فِى ٱلْيَمِّ بِأَنَّهُمْ كَذَّبُوا۟
بِـَٔايَٰتِنَا وَكَانُوا۟ عَنْهَا غَٰفِلِينَ ١٣٦

137. Waxaana Dhaxalsiinnay Qoomkii ahaa kuwa lagu Dullaysto Bariga Dhulka iyo Galbeedkiis (Masar iyo Shaam) een barakaynay Dhexdiisa, wayna u Dhammaatay Kalimada (Yaboohii) Eebahaa ee wanagsanaa Banuu Israa‘iil samirkoodii Dartiis. waxaana Baabi‘inay wuxuu Samaynayey Fircoon iyo Qoomkiisii iyo waxay Dhisayeeen.

وَأَوْرَثْنَا ٱلْقَوْمَ ٱلَّذِينَ كَانُوا۟ يُسْتَضْعَفُونَ
مَشَٰرِقَ ٱلْأَرْضِ وَمَغَٰرِبَهَا ٱلَّتِى بَٰرَكْنَا فِيهَا ۖ
وَتَمَّتْ كَلِمَتُ رَبِّكَ ٱلْحُسْنَىٰ عَلَىٰ بَنِىٓ إِسْرَٰٓءِيلَ
بِمَا صَبَرُوا۟ ۖ وَدَمَّرْنَا مَا كَانَ يَصْنَعُ
فِرْعَوْنُ وَقَوْمُهُۥ وَمَا كَانُوا۟ يَعْرِشُونَ ١٣٧

138. Waxaana Tallaabinay Banuu Israa‘iil baddii waxayna u Yimaadeen Qoom ku Nagi Sanamyadoodii markaasay dheheen Muusow Nooyeel

وَجَٰوَزْنَا بِبَنِىٓ إِسْرَٰٓءِيلَ ٱلْبَحْرَ فَأَتَوْا۟ عَلَىٰ قَوْمٍ
يَعْكُفُونَ عَلَىٰٓ أَصْنَامٍ لَّهُمْ ۚ قَالُوا۟ يَٰمُوسَى

أَجْعَل لَّنَآ إِلَٰهًا كَمَا لَهُمْ ءَالِهَةٌ ۚ قَالَ إِنَّكُمْ قَوْمٌ
تَجْهَلُونَ ﴿١٣٨﴾

ILaah siday iyaba Ilaahyo u yeesheen wuxuuna ku Yidhi idinku waxaad tihiin Qoom Jaahiliina.

إِنَّ هَٰٓؤُلَآءِ مُتَبَّرٌ مَّا هُمْ فِيهِ وَبَٰطِلٌ مَّا كَانُوا۟
يَعْمَلُونَ ﴿١٣٩﴾

139. Kuwaas waa lagu Halaagi waxay ku suganyihiin waana Baadhil waxay fali.

Eebe wuxuu ka warrami in markay Gaaladu Madax adaygeen Xaqii uu Halaagay, Baddana ku Maansheeyey, Fircoon iyo Qoomkiisiina saasay ku halaagsameen, waxaana dhulkii ku soo hadhay Dadkii la Dullaysan jiray, waxayna Dhaxleen Dhulkii Barakaysnaa, waxaana la halaagay Fircoon iyo Qoomkiisii iyo waxay Dhisayeen, waxaase Dhacay in kuwii Jaahiliinta ahaa ee Banuu Israa‘iil ay warsadeen Nabi Muuse inuu iLaahyo u Yeelo sida kuwa ay arkeen oo Caabudayey Sanamyo, una Sheegay inay Jaahiliinyihiin, waxay kuwaasu falina Khasaare iyo Baadhil yahay, waxaa sugnaatay in dad u Yimaadeen Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Kuna Dhaheen noo Samee Geed sida Gaaladu u Leedahay Geed ay hubkana ku Xoqdaan, Markaasuu Yidhi Eebaa wayn waa waxay ku dhaheen Banii Israa‘iil Nabi Muuse Ilaah noo yeel siday Ilaah u leeyihiin, waxaad qaadaysaan Jidkii kuwii hore, Taasina waxay Muujin in Xaqa layskaga daydo ee aan Xumaan iyo Dambi layska raacin layskagana dayanin. Al-Acraaf (136-139).

---

قَالَ أَغَيْرَ ٱللَّهِ أَبْغِيكُمْ إِلَٰهًا وَهُوَ
فَضَّلَكُمْ عَلَى ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿١٤٠﴾

140. Wuxuu yidhi ma wax Eebe ka soo hadhay yaan Ilaahnimo idiinka doonaa isagoo Caalamkan (Jooga) idinka Fadilay.

وَإِذْ أَنجَيْنَٰكُم مِّنْ ءَالِ فِرْعَوْنَ
يَسُومُونَكُمْ سُوٓءَ ٱلْعَذَابِ ۖ يُقَتِّلُونَ أَبْنَآءَكُمْ
وَيَسْتَحْيُونَ نِسَآءَكُمْ ۚ وَفِى ذَٰلِكُم
بَلَآءٌ مِّن رَّبِّكُمْ عَظِيمٌ ﴿١٤١﴾

141. Xusuusta markaan idinka Korinay Fircoon Dadkiisii iyagoo idin dhadhansiiyey Cadaab Xun, oo laynayey Wiilashiinna daynayeyna Gabdhihiinna, Arrintaasna waxaa ku Sugan Ibtilo Eebihiin Xaggiisa ka ahaatay oo wayn.

۞ وَوَٰعَدْنَا مُوسَىٰ ثَلَٰثِينَ لَيْلَةً وَأَتْمَمْنَٰهَا
بِعَشْرٍ فَتَمَّ مِيقَٰتُ رَبِّهِۦٓ أَرْبَعِينَ لَيْلَةً ۚ وَقَالَ
مُوسَىٰ لِأَخِيهِ هَٰرُونَ ٱخْلُفْنِى فِى قَوْمِى
وَأَصْلِحْ وَلَا تَتَّبِعْ سَبِيلَ ٱلْمُفْسِدِينَ ﴿١٤٢﴾

142. waxaan u yaboohnay Nabi Muuse Soddan habeen waxaana ku dhamaystirray Toban, wuxuuna ku dhammaaday Ballankii Eebihiis Afartan Habeen, wuxuuna ku yidhi Nabi Muuse Walaalkiis Haaruun iiga dambee Qoomkayga Wanaajina hana raacin Jidka Mufsidiinta.

Wuxuu Xusuusiyey Nabi Muuse Qoomkii Nicmooyinka Eebe iyo siduu Fircoon uga koriyey isagoo Wiilashana laynayey, Gabdhahana daynayey si uu u Dullaysto, Markaasaa Eebe u Yaboohay Nabi Muuse Kitaabkii Tawreed, siiyeyna Muddo Afartan Habeena si Eebe la hadalkiisa ugu darbado, waxaana Intaas la sii Joogay Dadkii Walaalkiis Nabi Haaruun oo uu u dardaarmay inuu Wanaajiyo Dadka Xumaanna ku Raacin.
Taasina waxay ku Tusin in Khayrka laysku baraarujiyo, Illeen Haaruunba Nabi buu ahaaye. Al-Acraaf (140-142).

143. Markuu u Yimid Nabi Muuse Ballankanagii oo la hadlay Eebihiis wuxuu yidhi Eebow i tus aan ku arkee, wuxuuna yidhi Eebe ima arkaysid ee day Buurta Hadday Meejeeda ku sugnaato markaasaad i arki, markuu Eebe u Daahiray Buurtii wuxuu ka yeelay Burbur waxaana dhacay Nabi Muuse suuxdin Darteed, markuu miyirsadayna wuxuu Yidhi (Eebow adaa) Nasahan waan kuu Toobad keenay waxaan ahay Mu‘miniinta kan ugu horreeya (Waqtigan) inaan Adduunka lagugu (arkayn).

وَلَمَّا جَآءَ مُوسَىٰ لِمِيقَٰتِنَا وَكَلَّمَهُۥ رَبُّهُۥ قَالَ رَبِّ
أَرِنِيٓ أَنظُرۡ إِلَيۡكَۚ قَالَ لَن تَرَىٰنِي وَلَٰكِنِ ٱنظُرۡ
إِلَى ٱلۡجَبَلِ فَإِنِ ٱسۡتَقَرَّ مَكَانَهُۥ فَسَوۡفَ تَرَىٰنِيۚ
فَلَمَّا تَجَلَّىٰ رَبُّهُۥ لِلۡجَبَلِ جَعَلَهُۥ دَكّٗا وَخَرَّ
مُوسَىٰ صَعِقٗاۚ فَلَمَّآ أَفَاقَ قَالَ سُبۡحَٰنَكَ
تُبۡتُ إِلَيۡكَ وَأَنَا۠ أَوَّلُ ٱلۡمُؤۡمِنِينَ ١٤٣

144. Wuxuu Yidhi Eebe Muusow waxaan kaa doortay Dadka (Sabankan) Diriddayda iyo lahadalkayga Dartiis ee qaado waxaan ku siiyey ahowna kuwa Mahdiya.

قَالَ يَٰمُوسَىٰٓ إِنِّي ٱصۡطَفَيۡتُكَ عَلَى ٱلنَّاسِ بِرِسَٰلَٰتِي
وَبِكَلَٰمِي فَخُذۡ مَآ ءَاتَيۡتُكَ
وَكُن مِّنَ ٱلشَّٰكِرِينَ ١٤٤

145. Waxaan ugu qorray alwaaxda wax kastoo wacdi iyo Caddayna, ee ku qaado Niyadadag farna Qoomkaaga inay qaataan, ha qaataan Teeda Fiicane Waxaan idin tusin Guryihii Faasiqiinta.

وَكَتَبۡنَا لَهُۥ فِي ٱلۡأَلۡوَاحِ مِن كُلِّ شَيۡءٖ
مَّوۡعِظَةٗ وَتَفۡصِيلٗا لِّكُلِّ شَيۡءٖ فَخُذۡهَا بِقُوَّةٖ
وَأۡمُرۡ قَوۡمَكَ يَأۡخُذُواْ بِأَحۡسَنِهَاۚ سَأُوْرِيكُمۡ
دَارَ ٱلۡفَٰسِقِينَ ١٤٥

Nabi Muuse markuu ku Yimid Muddadii oo Eebe la hadlay yuu ka Baryey inuu Arko, Eebese sarreeye wuxuu u sheegay inuusan arkayn, markuu Buurtii u Daahiriyeyna ay Burburtay, Nabi Muusana Suuxay markuu miyirsadayna uu wayneeyey Eebe oo Nasahay, markaas Eebe Xusuusiyey siduu u Doortay uuna faray inuu qabsado waxa loo waxyooday ee waanada iyo Caddaynta ah, qoomkiisana faro inay aad u qabsadaan, wuxuuna Tusay Guryihii kuwii Faasiqiinta ahaa ee la Halaagay.
Nabigu (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu Yidhi: Dadku way Suuxi Qiyaamada anaana u soo hor miyirsan markaasaan Arkaa Nabi Muuse oo Carshiga haysta, marka ma ogi inuu hortay soo Miyirsaday iyo inuu ka mid yahay kuwa Eebe ka soo Reebay, Taasina waxay ku Tusin Sharafta Nabigeenna iyo Nabi Muusaba, iyadoo Nabiyaduba, Sharaf wada leeyihiin.
Al-Acraaf (143-145).

---

146. Waxaan ka Iilaa Aayaadkayga kuwa isku Kibriya Dhulka Xaq darro, hadday arkaan Aayaad kasta ma Rumeeyaan hadday arkaan Jidka Hanuunka kama Yeeshaan Waddo, hadday Arkaan Waddada Baadidana waxay ka yeeshaan Jid, waxaana ugu Wacan inay Beeniyeen Aayaadkanaga oy ahaayeen kuwo Halmaamay.

سَأَصۡرِفُ عَنۡ ءَايَٰتِيَ ٱلَّذِينَ يَتَكَبَّرُونَ فِي ٱلۡأَرۡضِ
بِغَيۡرِ ٱلۡحَقِّ وَإِن يَرَوۡاْ كُلَّ ءَايَةٖ لَّا يُؤۡمِنُواْ
بِهَا وَإِن يَرَوۡاْ سَبِيلَ ٱلرُّشۡدِ لَا يَتَّخِذُوهُ سَبِيلٗا
وَإِن يَرَوۡاْ سَبِيلَ ٱلۡغَيِّ يَتَّخِذُوهُ سَبِيلٗاۚ ذَٰلِكَ
بِأَنَّهُمۡ كَذَّبُواْ بِـَٔايَٰتِنَا وَكَانُواْ عَنۡهَا غَٰفِلِينَ ١٤٦

147. Kuwa Beeniyeen Aayaadkanaga iyo la Kulankanaga Aakhiro waxaa Buray Camalyaalkooda Miyaase laga abaal mariyaa waxay Camal falayeen Mooyee.

وَٱلَّذِينَ كَذَّبُواْ بِـَٔايَٰتِنَا وَلِقَآءِ ٱلۡأٓخِرَةِ
حَبِطَتۡ أَعۡمَٰلُهُمۡۚ هَلۡ يُجۡزَوۡنَ إِلَّا مَا كَانُواْ
يَعۡمَلُونَ ١٤٧

148. Waxay ka Yeesheen qoomkii Nabi Muuse Gadaashiis Jawhartoodii Dibi Cod leh, miyeyna arkaynin inuusan lahadlaynin kuna Toosinaynin Jid, way Yeesheen iyagoo Daalimiin ah.

وَٱتَّخَذَ قَوۡمُ مُوسَىٰ مِنۢ بَعۡدِهِۦ مِنۡ حُلِيِّهِمۡ عِجۡلٗا
جَسَدٗا لَّهُۥ خُوَارٌۚ أَلَمۡ يَرَوۡاْ أَنَّهُۥ لَا يُكَلِّمُهُمۡ
وَلَا يَهۡدِيهِمۡ سَبِيلًاۘ ٱتَّخَذُوهُ
وَكَانُواْ ظَٰلِمِينَ ١٤٨

149. Markii Gacmahooda lagu Riday (Nidaamoodeen) oy arkeen inay Dhumeen waxay Dhaheen Hadduusan noo Naxariisan Eebahanno oosan noo Dambi Dhaafin waxaan Noqonaynaa kuwo Khasaara.

وَلَمَّا سُقِطَ فِيٓ أَيۡدِيهِمۡ وَرَأَوۡاْ أَنَّهُمۡ قَدۡ ضَلُّواْ
قَالُواْ لَئِن لَّمۡ يَرۡحَمۡنَا رَبُّنَا وَيَغۡفِرۡ لَنَا
لَنَكُونَنَّ مِنَ ٱلۡخَٰسِرِينَ ١٤٩

Xaqa waxaa laga Leexin kuwa iskibriya oon Xaqa Rumayn, hadday Xumaan arkaanna Raaci, Illeen waxay Beeniyeen oo Halmaameen Aayaadka Eebe, kuwa Beeniya Aayaadka Eebe iyo la Kulankiisana waxaa Buri Camalkooda. Sufyaan Binu Cuyeyna wuxuu Yidhi: Waxaa laga siibay Fahminta Quraanka markaasaa laga Leexiyey.
Aayadaha kale waxay ka warrami in Qoomkii Nabi Muuse intuu ka Maqnaa ka yeesheen Dibi waxay Caabudaan, waana Doqonnimo Illeen wax ma taree, markay arkeen inay Khasaareenna waxay Sheegeen haddaan Eebe u Dhaafin una Naxariisan inay Dhab u Khasaareen. Al-Acraaf (146-149).

---

150. Markuu ku soo Noqday Nabi Muse qoomkiisii isagoo Cadhaysan oo Walbahaarsan wuxuu yidhi waxaa Xun Waxaad iiga dambeyseen Gadaashay, ma waxaad Dadajisateen Amarkii Eebihiin wuxuuna Tuuray Alwaaxdii wuxuuna Qabtay Madaxa Walaalkiis Isagoo Xaggiisa u Jiidi, wuxuuna Yidhi Ina Hooyoow qoomku way i tabaryaraysteen waxayna u dhawaadeen inay i Dilaan ee ha igaga farxin Colka hana iga yeelin la Jirka Qoomka Daalimiinta ah.

وَلَمَّا رَجَعَ مُوسَىٰٓ إِلَىٰ قَوۡمِهِۦ غَضۡبَٰنَ أَسِفٗا قَالَ بِئۡسَمَا
خَلَفۡتُمُونِي مِنۢ بَعۡدِيٓۖ أَعَجِلۡتُمۡ أَمۡرَ رَبِّكُمۡۖ وَأَلۡقَى
ٱلۡأَلۡوَاحَ وَأَخَذَ بِرَأۡسِ أَخِيهِ يَجُرُّهُۥٓ إِلَيۡهِۚ قَالَ ٱبۡنَ أُمَّ
إِنَّ ٱلۡقَوۡمَ ٱسۡتَضۡعَفُونِي وَكَادُواْ يَقۡتُلُونَنِي
فَلَا تُشۡمِتۡ بِيَ ٱلۡأَعۡدَآءَ وَلَا تَجۡعَلۡنِي مَعَ ٱلۡقَوۡمِ
ٱلظَّٰلِمِينَ ١٥٠

151. Wuxuuna yidhi Nabi Muuse Eebow u Dambi Dhaaf ani iyo Walaalkay nana gali Naxariistaada adaa Naxariis badane ahe.

قَالَ رَبِّ ٱغۡفِرۡ لِي وَلِأَخِي وَأَدۡخِلۡنَا
فِي رَحۡمَتِكَۖ وَأَنتَ أَرۡحَمُ ٱلرَّٰحِمِينَ ١٥١

152. Kuwa Yeeshay Dibi waxaa Gaadhi Cadho Eebahood iyo Dulli Nolosha adduunyo saasaana ku Abaal marinaa Been abuurtayaasha.

إِنَّ ٱلَّذِينَ ٱتَّخَذُواْ ٱلۡعِجۡلَ سَيَنَالُهُمۡ غَضَبٌ
مِّن رَّبِّهِمۡ وَذِلَّةٌ فِي ٱلۡحَيَوٰةِ ٱلدُّنۡيَاۚ وَكَذَٰلِكَ
نَجۡزِي ٱلۡمُفۡتَرِينَ ﴿١٥٢﴾

153. Kuwa Falay Xumaan Markaas Toobad keenay intaas ka dib oo Rumeeyey Xaqa Eebahaa intaas ka dib waa Dambi Dhaafe Naxariista.

وَٱلَّذِينَ عَمِلُواْ ٱلسَّيِّـَٔاتِ ثُمَّ تَابُواْ مِنۢ بَعۡدِهَا
وَءَامَنُوٓاْ إِنَّ رَبَّكَ مِنۢ بَعۡدِهَا لَغَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿١٥٣﴾

Markuu Nabi Muuse ku soo Noqday Qoomkiisii isagoo Cadhaysan oo ka Walbahaarsan waxay faleen wuxuu ku yidhi Waxaa Xun waxaad iiga Dambeyseen, ma waxaad Dedejisateen Amarkii Eebe, wuxuuna Cadho la Tuuray Alwaaxii, wuxuuna Madaxa qabtay Walaalkiis Haaruun oo uu ku Dhaafay Gadaashii wuuna Jiiday,
Markaasuu Calaacalay oo ku Yidhi ina Hooyo Madaxa hay qabanin, qoomkii way i Liideen ina Dili Gaadheen ee Colka ha igaga Farxin, Daalimiintana haygala mid Dhigin, Markuu ogaaday inuu walaalkii Dambi la‘aan yahay yuu u Dambi Dhaaf warsaday Naftiisa iyo Walaalkiis.
Waana Abaalka Been abuurayaasha, Ciddiise Xumaan Fasha oo Toobad keenta oo Xaqa Rumaysa Eebe wuu u Dambi Dhaafi.
Abuu Qilaabo wuxuu Yidhi: Waxaa Dulli Mudan Been Abuurte oo Dhan. Al-Acraaf (150-153).

---

154. Markay Cadhadu ka Xasishay Nabi Muuse wuxuu Qaatay Alwaaxdii waxaana ku qorraa hanuun iyo Naxariis u ah kuwa Eebahood ka Cabsan.

وَلَمَّا سَكَتَ عَن مُّوسَى ٱلۡغَضَبُ أَخَذَ ٱلۡأَلۡوَاحَۖ
وَفِي نُسۡخَتِهَا هُدٗى وَرَحۡمَةٞ لِّلَّذِينَ هُمۡ
لِرَبِّهِمۡ يَرۡهَبُونَ ﴿١٥٤﴾

155. Wuxuu ka Doortay Nabi Muuse Qoomkiisa Toddobaatan Nin Ballankanaga Dartiis, markay qabatay Gariirku wuxuu Yidhi Eebow haddaad Doonto waad halaagi lahayd horay iyaga iyo Anigaba, ma waxaad noo halaagi waxay faleen Sufaho naga mida, waa Imtixaankaaga Ciddaad doontana waad Dhumisaa kaad dontana waad hanuunisaa adaa Wali noo ah ee noo Dambi Dhaaf noona Naxariiso adaa Dambi Dhaafe Khayr roon ahe.

وَٱخۡتَارَ مُوسَىٰ قَوۡمَهُۥ سَبۡعِينَ رَجُلٗا لِّمِيقَٰتِنَاۖ فَلَمَّآ
أَخَذَتۡهُمُ ٱلرَّجۡفَةُ قَالَ رَبِّ لَوۡ شِئۡتَ أَهۡلَكۡتَهُم
مِّن قَبۡلُ وَإِيَّٰيَۖ أَتُهۡلِكُنَا بِمَا فَعَلَ ٱلسُّفَهَآءُ مِنَّآۖ إِنۡ هِيَ
إِلَّا فِتۡنَتُكَ تُضِلُّ بِهَا مَن تَشَآءُ وَتَهۡدِي مَن تَشَآءُۖ
أَنتَ وَلِيُّنَا فَٱغۡفِرۡ لَنَا وَٱرۡحَمۡنَاۖ وَأَنتَ خَيۡرُ ٱلۡغَٰفِرِينَ ﴿١٥٥﴾

156. Noona qor adduunyadan Wanaag iyo Aakhiraba waannu kuu noqonaye, wuxuu Yidhi Cadaabkaygu wuxuu ku dhici Ciddaan Doono, Naxariistayduna waxay u Waasac Noqotay wax kasta, waxaana u qori kuwa

۞ وَٱكۡتُبۡ لَنَا فِي هَٰذِهِ ٱلدُّنۡيَا حَسَنَةٗ وَفِي
ٱلۡأٓخِرَةِ إِنَّا هُدۡنَآ إِلَيۡكَۚ قَالَ عَذَابِيٓ أُصِيبُ بِهِۦ
مَنۡ أَشَآءُۖ وَرَحۡمَتِي وَسِعَتۡ كُلَّ شَيۡءٖۚ

Dhawrsada oo Bixiya Zakada iyo Kuwa Aayaadkaygana Rumeeya.

فَسَأَكْتُبُهَا لِلَّذِينَ يَتَّقُونَ وَيُؤْتُونَ
ٱلزَّكَوٰةَ وَٱلَّذِينَ هُم بِـَٔايَٰتِنَا يُؤْمِنُونَ ﴿١٥٦﴾

Markay Cadhadii ka Ba'day Nabi Muuse wuxuu qaatay Looxdii oo hanuun iyo Naxariis ku qorantahay, kuna waantoobi Ciddii Cabsan, wuxuuna Doortay Toddobaatan Qoomkiisii ka mida inay Eebe u Toobadkeenaan, markuu Gariirkii qabtayna wuxuu ku calaacalay in hadduu Eebe doono uu halaagi lahaa mar hore, Haddase ma waxaa naloo Halaagi wax kuwo Xun oo Naga mida faleen, Eebow waa Imtixaamkaagii, Ciddaad Doontana waad Dhumisaa taad Doontana waad hanuunisaa, adaana wali noo ah, ee noo Dambi Dhaaf noona Naxariiso, adaa Dabmi Dhaafe Khayr roon ahe, noona qor adduun iyo Akharaba Wanaag, waan kuu Toobad keenaye, wuxuuna u sheegay Eebe inuu Cadaabkiisu ku Dhici Cidduu Doono, naxariistiisuna wax kasta u Waasac tahay, Khayrna mudan kuwa Dhawrsada oo Bixiya Zakada, Rumeeyana Aayaadka Eebe.
Taasina waxay ku Tusin Waasac Nimada Naxariista Eebe iyo in lagu Dadaalo sidii loo Heli lahaa. Al-Acraaf (154-156).

---

157. ee ah kuwa Raaca Rasuulka Nabiga ah ee Umiga ah ee ah kay ka heleyeen Isagoo ku qoran agtooda Tawreed iyo Injiil Farana wanaagga kana reeba Xumaanta una Baneeya Wanaagga (Xalaasha) kana Xarrima Xumaanta (Xaaraanta) kana dejiya Culayskii iyo Xadhkihii korkooda ahaa, kuwa Rumeeyey Nabigaas oo Qaddariyey oo u Gargaaray oo Raacay Nuurka lagu soo Dejiyey kuwaasu waa uun kuwa Liibaanay.

ٱلَّذِينَ يَتَّبِعُونَ ٱلرَّسُولَ ٱلنَّبِىَّ ٱلْأُمِّىَّ ٱلَّذِى
يَجِدُونَهُۥ مَكْتُوبًا عِندَهُمْ فِى ٱلتَّوْرَىٰةِ
وَٱلْإِنجِيلِ يَأْمُرُهُم بِٱلْمَعْرُوفِ وَيَنْهَىٰهُمْ
عَنِ ٱلْمُنكَرِ وَيُحِلُّ لَهُمُ ٱلطَّيِّبَٰتِ وَيُحَرِّمُ
عَلَيْهِمُ ٱلْخَبَٰٓئِثَ وَيَضَعُ عَنْهُمْ إِصْرَهُمْ
وَٱلْأَغْلَٰلَ ٱلَّتِى كَانَتْ عَلَيْهِمْ ۚ فَٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ بِهِۦ
وَعَزَّرُوهُ وَنَصَرُوهُ وَٱتَّبَعُوا۟ ٱلنُّورَ ٱلَّذِىٓ أُنزِلَ
مَعَهُۥٓ ۙ أُو۟لَٰٓئِكَ هُمُ ٱلْمُفْلِحُونَ ﴿١٥٧﴾

158. Waxaad Dhahdaa Dadow anugu waxaan ahay Rasuulkii Eebe ee Xaggiinna Dhammaan, waana Eebaha iska leh Xukunka Samooyinka iyo Dhulka, ILaahay mooyee Eebe kalana ma jiro isagaa wax nooleeya, waxna Dila ee Rumeeya Eebe iyo Rasuulkiisa Nabiga ah ee Umiga ah ee Rumeeyey Eebe iyo Malaa'igtiisa Raacana inaad hanuuntaan.

قُلْ يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ إِنِّى رَسُولُ ٱللَّهِ إِلَيْكُمْ
جَمِيعًا ٱلَّذِى لَهُۥ مُلْكُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ۖ
لَآ إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ يُحْىِۦ وَيُمِيتُ ۖ فَـَٔامِنُوا۟ بِٱللَّهِ وَرَسُولِهِ
ٱلنَّبِىِّ ٱلْأُمِّىِّ ٱلَّذِى يُؤْمِنُ بِٱللَّهِ
وَكَلِمَٰتِهِۦ وَٱتَّبِعُوهُ لَعَلَّكُمْ
تَهْتَدُونَ ﴿١٥٨﴾

Aayadahani waxay Tilmaami Nabiga Muxameda (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) oo ah inuu wanaagga faro Xumaantana ka reebo, Xalaashana u Banneeyo Xaaraantana ka reebo, Dhibka iyo Culayskana ka fududeeyo, oy Naxariista Eebena Mudan Ciddii raacda, oo Rumaysa, qaddarisa, U gargaarta, oo Raacda Quraanka Nuurka ah, inay Liibaanto, waana Rasuul Eebe u soo diray Dadkoo Dhan, oy Waajibtahay in la Raaco si loo hanuuno.
wana taas Tilmaanta Nabiga, waxa Dadka laga dooni inay falaan oo Xaq ah Ciddaan Indho la'ayn. Al-Acraaf (157-158).

159. Waxaa ka mida Qoomkii Nabi Muuse Umad ku Hanuunsanayd Xaqa kuna Caddaalad falaysay.

وَمِن قَوْمِ مُوسَىٰٓ أُمَّةٌ يَهْدُونَ بِٱلْحَقِّ وَبِهِۦ
يَعْدِلُونَ ﴿١٥٩﴾

160. Waxaana u kala gaynay Laba iyo Toban Farac oo Ummadood, waxaana u Waxyoonay Nabi Muuse markay Waraab warsadeen Qoomkiisii inuu ku garaaco Ushiisa Dhagaxa waxaana ka soo burqatay laba iyo toban ilood cid kastana waxay Ogaatay Meejey ka Cabbi lahayd, waxaana ku hadhaynay Daruuro, waxaana ku soo Dejinay Manni (Macaan) iyo Cunno, waxaana ku nidhi ka Cuna wanaagaan idinku Arzuqay, mana ayan na dulmiyin waxayse Dulmiyeen Naftooda.

وَقَطَّعْنَٰهُمُ ٱثْنَتَىْ عَشْرَةَ أَسْبَاطًا أُمَمًا ۚ وَأَوْحَيْنَآ
إِلَىٰ مُوسَىٰٓ إِذِ ٱسْتَسْقَىٰهُ قَوْمُهُۥٓ أَنِ ٱضْرِب
بِّعَصَاكَ ٱلْحَجَرَ ۖ فَٱنۢبَجَسَتْ مِنْهُ
ٱثْنَتَا عَشْرَةَ عَيْنًا ۖ قَدْ عَلِمَ كُلُّ أُنَاسٍ
مَّشْرَبَهُمْ ۚ وَظَلَّلْنَا عَلَيْهِمُ ٱلْغَمَٰمَ وَأَنزَلْنَا
عَلَيْهِمُ ٱلْمَنَّ وَٱلسَّلْوَىٰ ۖ كُلُوا۟ مِن طَيِّبَٰتِ
مَا رَزَقْنَٰكُمْ ۚ وَمَا ظَلَمُونَا وَلَٰكِن
كَانُوٓا۟ أَنفُسَهُمْ يَظْلِمُونَ ﴿١٦٠﴾

161. Markii lagu yidhi dega Magaaladaa kana Cuna Meejaad doontaan Dhehana Eebow noo Dambi dhaaf, kana gala Albaabka idinkoo Sujuudsan aan idiin Dhaafno Dambigiinee una siyaadinno samafalayaashee.

وَإِذْ قِيلَ لَهُمُ ٱسْكُنُوا۟ هَٰذِهِ ٱلْقَرْيَةَ وَكُلُوا۟
مِنْهَا حَيْثُ شِئْتُمْ وَقُولُوا۟ حِطَّةٌ وَٱدْخُلُوا۟
ٱلْبَابَ سُجَّدًا نَّغْفِرْ لَكُمْ خَطِيٓـَٰٔتِكُمْ ۚ
سَنَزِيدُ ٱلْمُحْسِنِينَ ﴿١٦١﴾

162. Waxayse ku badaleen kuwii dulmi falay oo ka mida hadal ka duwan kii loo yidhi (Fala) waxaana ku Dirray Cadaab Samada kaga Yimid dulmigoodii Dartiis.

فَبَدَّلَ ٱلَّذِينَ ظَلَمُوا۟ مِنْهُمْ قَوْلًا غَيْرَ ٱلَّذِى
قِيلَ لَهُمْ فَأَرْسَلْنَا عَلَيْهِمْ رِجْزًا مِّنَ
ٱلسَّمَآءِ بِمَا كَانُوا۟ يَظْلِمُونَ ﴿١٦٢﴾

Eebeheen wuxuu inoo Sheegay inuu qoomkii Nabi Muuse ka mid ahaayeen Dadka Xaqa raacay oo ku socday, kana yeelay Banii Israa‘iil qaybo Midba meel ka cabto, Eebana ugu Nicmeeyey Nicmooyin Badan sidaan soo sheegnay horay ayse Dulmi faleen, wanaagiina Xumaan ku badaleen, Taasina waa Caadadooda Xun ee Xaqa ka leexsan. waxaase lagu abaal mariyey Ciqaab daran, ay Waajibtahay in laga Digtoonaado isagoo kale. Al-Acraaf (159-162).

---

163. Warso (Yuhuud) Magaaladii Badda ku Dhawayd (Dadkeedii) markay Xadgudbayeen Sabtida, oo Kalluunkoodu u Imanayey Maalinta Sabtida ah isagoo Muuqda, Maalintaan Sabti ahaynna uma Timaaddo, saasaana ugu Imtixaanaa Faasiqnimadooda Darteed.

وَسْـَٔلْهُمْ عَنِ ٱلْقَرْيَةِ ٱلَّتِى كَانَتْ حَاضِرَةَ
ٱلْبَحْرِ إِذْ يَعْدُونَ فِى ٱلسَّبْتِ إِذْ تَأْتِيهِمْ
حِيتَانُهُمْ يَوْمَ سَبْتِهِمْ شُرَّعًا وَيَوْمَ
لَا يَسْبِتُونَ ۙ لَا تَأْتِيهِمْ ۚ كَذَٰلِكَ نَبْلُوهُم
بِمَا كَانُوا۟ يَفْسُقُونَ ﴿١٦٣﴾

164. Ka Warran markay Tidhi Umad ka mida maxaad u Wacdiyeysaan qoom Eebe halaagi ama u Cadaabi si daran, waxayna dhaheen waa Eebe u Cudur daarasho, iyo inay Dhawrsadaan inay u Dhawyihiin.

وَإِذْ قَالَتْ أُمَّةٌ مِّنْهُمْ لِمَ تَعِظُونَ قَوْمًا ٱللَّهُ مُهْلِكُهُمْ
أَوْ مُعَذِّبُهُمْ عَذَابًا شَدِيدًا قَالُوا۟ مَعْذِرَةً إِلَىٰ رَبِّكُمْ
وَلَعَلَّهُمْ يَتَّقُونَ ﴿١٦٤﴾

165. Markay Halmaameen wixii lagu waaniyey waxaan korinay kuwii Xumaanta Reebayey waxaana ku qabanay kuwii Dulmiga falay Cadaab Xun Faasiqnimadooda Darteed.

فَلَمَّا نَسُوا۟ مَا ذُكِّرُوا۟ بِهِۦٓ أَنجَيْنَا ٱلَّذِينَ يَنْهَوْنَ
عَنِ ٱلسُّوٓءِ وَأَخَذْنَا ٱلَّذِينَ ظَلَمُوا۟ بِعَذَابٍۭ بَـِٔيسٍۭ
بِمَا كَانُوا۟ يَفْسُقُونَ ﴿١٦٥﴾

166. Markay ku Madax adaygeen wixii laga reebay yaan ku nidhi Noqda Daanyeer Dullaysan.

فَلَمَّا عَتَوْا۟ عَن مَّا نُهُوا۟ عَنْهُ قُلْنَا لَهُمْ كُونُوا۟ قِرَدَةً
خَـٰسِـِٔينَ ﴿١٦٦﴾

Wuxuu Eebe halkan kaga warramay Yuhuuddii deganayd magaalo Badda ku Dhawayd oo lagu sheegay Magaceeda Aayla, Markii Dadkeedii Xadgudbeen oo Kalluunka laga reebay Maalinta Sabtida ah ay Ugaadhsadeen Markuu u soo Muuqdo Sabtida, Maalmaha kalana ka qarsoomo Imtixaan dartiis, waxayna u qaybsameen Saddex qeybood: Koox Ugaadhsatay, mid·ka Reebtay Xumaanta, iyo mid iska Aamustay, Kuna yidhi Kooxdii wax Reebaysay maxaad u Waaninaysaan Dad Eebe Halaagi ama Cadaabi, markaas ugu Jawaabeen inaan Waajib gudanno yaannu u Fali, ama ay Dhawrsadaan, markiise ay halmaameen waanadii yaa waxaa la koriyey kuwii Xumaanta Reebayey, waxaana Cadaab lagu qabtay kuwii Xumaanta falay, Laguna yidhi Daanyeer Dullaysan noqda, Taasi waxay ku tusin Waajibnimada Xumaan Reebka iyo Samo farka, waxaana la sheegay in Yuhuuddu Dabi jireen Kalluunka Maalinta Sabtida ah, markuu ku dhacana ay la baxaan Maalinta Dambe, Taasina waxay ku tusin Khayaamada iyo Xumaanta Yuhuud.
Tan kale waxaa laga aamusay kuwii aamusay, waxaana lays warsaday in la halaagay iyo in la Nabadgaliyey, Labadana waa la Sheegay. Al-Acraaf (163-166).

---

167. Xusuusta markuu Eebe Ogeysiiyey inuu u soo Bixiyaa Yuhuud tan iyo Qiyaamaha cid Dhadhansiisa Cadaab Xun, Eebahaana Ciqaabtiisu way Deg degtaa, waana Dambi Dhaafe Naxariista.

وَإِذْ تَأَذَّنَ رَبُّكَ لَيَبْعَثَنَّ عَلَيْهِمْ إِلَىٰ يَوْمِ
ٱلْقِيَـٰمَةِ مَن يَسُومُهُمْ سُوٓءَ ٱلْعَذَابِ ۗ إِنَّ رَبَّكَ
لَسَرِيعُ ٱلْعِقَابِ ۖ وَإِنَّهُۥ لَغَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿١٦٧﴾

168. Waxaana ku kala gaynay Dhulka iyagoo Umada ah, kuwo suuban iyo kuwo kalaba waxaana ku imtixaannay wanaag iyo Dhibba inay Noqdaan.

وَقَطَّعْنَـٰهُمْ فِى ٱلْأَرْضِ أُمَمًا ۖ مِّنْهُمُ
ٱلصَّـٰلِحُونَ وَمِنْهُمْ دُونَ ذَٰلِكَ ۖ وَبَلَوْنَـٰهُم
بِٱلْحَسَنَـٰتِ وَٱلسَّيِّـَٔاتِ لَعَلَّهُمْ يَرْجِعُونَ ﴿١٦٨﴾

169. Waxaana Baddelay kuwo Xun oo Dhaxlay Kitaabkii qaadanina Muuqa Adduunyadan Dhaw, iyagoo Dhihi

فَخَلَفَ مِنۢ بَعْدِهِمْ خَلْفٌ وَرِثُوا۟ ٱلْكِتَـٰبَ يَأْخُذُونَ
عَرَضَ هَـٰذَا ٱلْأَدْنَىٰ وَيَقُولُونَ سَيُغْفَرُ لَنَا وَإِن يَأْتِهِمْ

waa naloo dhaafi hadduu u Yimaaddo muuqaal la midana way qaataan, miyaan laga qaadin Ballankii Kitaabka inayan Eebe waxaan Xaq ahayn ku sheegin oyna Akhriyin waxa Dhaxdiisa ah, Daarta Aakhiro yaana u Khayr roon kuwa dhawrsada ee miyeeydan wax kasayn.

عَرَضٌ مِّثْلُهُۥ يَأْخُذُوهُ ۚ أَلَمْ يُؤْخَذْ عَلَيْهِم مِّيثَٰقُ ٱلْكِتَٰبِ
أَن لَّا يَقُولُوا۟ عَلَى ٱللَّهِ إِلَّا ٱلْحَقَّ وَدَرَسُوا۟ مَا فِيهِ ۗ
وَٱلدَّارُ ٱلْءَاخِرَةُ خَيْرٌ لِّلَّذِينَ
يَتَّقُونَ ۗ أَفَلَا تَعْقِلُونَ ﴿١٦٩﴾

170. Kuwa Qabsada Kitaabka oo Ooga Salaadda annagu ma dayacno ajriga kuwa wax Suubiya (Samo fala).

وَٱلَّذِينَ يُمَسِّكُونَ بِٱلْكِتَٰبِ وَأَقَامُوا۟ ٱلصَّلَوٰةَ
إِنَّا لَا نُضِيعُ أَجْرَ ٱلْمُصْلِحِينَ ﴿١٧٠﴾

Wuxuu Eebe u yaboohay Yuhuud in loo soo Bixiyo Tan iyo qiyaamada Dad Dhadhansiiya Ciqaab daran, Eebana isagaa wax Ciqaaba, Naxariistana, waxaana lagu kala saydhay Adduunka iyagoo kuwo Roon iyo kuwo Xunba lahaa, waana la Imtixaamay Bal inay waantoobaan, waxaase ka dambeeyey kuwaas kuwo Adduunyada ka doortay Aakhiro inkastoo Ballan laga qaaday waxaan Run iyo xaq ahayn inayna Eebe ku sheegin, oy Kitaabkana Bartaan, Illeen daarta Aakhiro Yaa u Khayroon Ciddii Dhawrsan oo wax kasiye, Ciddiise Qabsata Kitaabka Xaqa ah iyo Xaqa dhabta ah oo Salaadda Oogta Eebe ma Dayaco Ajriga Sama falaha. waxayna ku tusin Wanaag ku Dadaalka. Al-Acraaf (167-170).

---

171. (Ka warran) markaan ku koryeelay Buurtii, sidii isagoo hadhayn, una maleeyeen inuu ku Dhici, kuna nidhi ku qaata waxaan idin siinay Niyad Adag, kuna waana qaata waxa ku sugan si aad u dhawrsataan.

۞ وَإِذْ نَتَقْنَا ٱلْجَبَلَ فَوْقَهُمْ كَأَنَّهُۥ ظُلَّةٌ وَظَنُّوٓا۟ أَنَّهُۥ
وَاقِعٌۢ بِهِمْ خُذُوا۟ مَآ ءَاتَيْنَٰكُم بِقُوَّةٍ وَٱذْكُرُوا۟ مَا فِيهِ
لَعَلَّكُمْ تَتَّقُونَ ﴿١٧١﴾

172. (Xusuuso) markuu Eebahaa ka qabtay Dadka Dhabarkooda Faracoodii uuna marag uga Yeelay Naftooda, kuna Yidhi Miyaanaan Eebihiin ahayn, oy dhaheenna inaad Eebahanno tahay yaan Marag Kacnay, inaydaan dhihin Maalinta Qiyaame annagu Waan halmaansanayn kan.

وَإِذْ أَخَذَ رَبُّكَ مِنۢ بَنِىٓ ءَادَمَ مِن ظُهُورِهِمْ ذُرِّيَّتَهُمْ
وَأَشْهَدَهُمْ عَلَىٰٓ أَنفُسِهِمْ أَلَسْتُ بِرَبِّكُمْ ۖ قَالُوا۟
بَلَىٰ ۛ شَهِدْنَآ ۛ أَن تَقُولُوا۟ يَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ إِنَّا كُنَّا
عَنْ هَٰذَا غَٰفِلِينَ ﴿١٧٢﴾

173. Ama aydaan Dhihin waxaa wax la wadaajiyey (Eebe) Aabbayaalkanagii mar hore annaguna waxaan nahay farac ka Dambeeyey ee miyaad noo halaagi waxay faleen Xumo falayaal.

أَوْ تَقُولُوٓا۟ إِنَّمَآ أَشْرَكَ ءَابَآؤُنَا مِن قَبْلُ وَكُنَّا ذُرِّيَّةً
مِّنۢ بَعْدِهِمْ ۖ أَفَتُهْلِكُنَا بِمَا فَعَلَ ٱلْمُبْطِلُونَ ﴿١٧٣﴾

174. Saasaanu u Caddaynaa Aayaadka iyo inay u Noqdaan Xaqa.

وَكَذَٰلِكَ نُفَصِّلُ ٱلْءَايَٰتِ وَلَعَلَّهُمْ يَرْجِعُونَ ١٧٤

Eebe wuxuu ku Amray Banii Israa‘iil inay Niyad adag ku qaataan Kitaabkii Tawreed, wuxuuna korkooda yeelay Buur hadhaysay, haddayna Aqbalina lagu dabooli, Waxaa Kale oo la faray inay ku Socdaan Tawreed si ay u Dhawrsadaan. Aayadaha kalana waxay ka warrami in Eebe Banii Aadamka Naftooda Marag uga yeelay, warsadayna inuu Eebahood yahay iyo in kale, oyna marag kaceen Ilaahnimada Eebe, si ayna u Dhihin Maalinta qiyaame waxaan halmaansanayn oo Jaahil ka ahayn Arrintan, ama ayan u Dhihin waxaa Eebe la wadaajiyey Aabbayaalkanno annaguse waxaan nahay Farac Dambeeyey ee ma waxaa naloo halaagi waxay Dad Xun faleen, Saasuuna Eebe ugu Caddeeyey Aayaadka inay Xaqa u Noqdaan.
Taasina waxay Muujin inaan Dadka Cudur Daar u hadhin iyo waxay ku Calaacalaan. Waxaana la wariyey in Eebe kulmiyey Arwaaxda Dadka Ballanna ka qaaday inay Rumeeyaan Xaqa, Eebana u Hogaansamaan.
waxaana habboon Eebe ka yaabid, Toosnaan iyo Wanaag Jacayl. Al-Acraaf (171-174).

---

175. Ku Akhri korkooda kii warkiisii aan Siinay Aayaadkanaga oo ka Siibtay Shaydaanna uu Raacay (Isaga) Noqdayna kuwa Baadida ah.

وَٱتْلُ عَلَيْهِمْ نَبَأَ ٱلَّذِىٓ ءَاتَيْنَٰهُ ءَايَٰتِنَا فَٱنسَلَخَ مِنْهَا فَأَتْبَعَهُ ٱلشَّيْطَٰنُ فَكَانَ مِنَ ٱلْغَاوِينَ ١٧٥

176. Haddaan Doonno waannu koryeeli lahayn, hasayeeshee wuxuu u iishay Dhulka (Adduunyo Jacayl) wuxuuna Raacay Hawadiisa, wuxuuna la mid yahay Eey haddaad Erido wuu lalmin Carrabka, haddaad Deysana wuu lalmin, saasna waa Masalka Qoomka Beeniyey Aayaadkanaga ee uga warran Qisooyin inay Waantoomaan.

وَلَوْ شِئْنَا لَرَفَعْنَٰهُ بِهَا وَلَٰكِنَّهُۥٓ أَخْلَدَ إِلَى ٱلْأَرْضِ وَٱتَّبَعَ هَوَىٰهُ ۚ فَمَثَلُهُۥ كَمَثَلِ ٱلْكَلْبِ إِن تَحْمِلْ عَلَيْهِ يَلْهَثْ أَوْ تَتْرُكْهُ يَلْهَث ۚ ذَّٰلِكَ مَثَلُ ٱلْقَوْمِ ٱلَّذِينَ كَذَّبُوا۟ بِـَٔايَٰتِنَا ۚ فَٱقْصُصِ ٱلْقَصَصَ لَعَلَّهُمْ يَتَفَكَّرُونَ ١٧٦

177. Waxaa Tusaale u Xun Qoomkii Beeniyey Aayaadkanaga, Naftoodana waxay ahaayeen kuwo Dulmiya.

سَآءَ مَثَلًا ٱلْقَوْمُ ٱلَّذِينَ كَذَّبُوا۟ بِـَٔايَٰتِنَا وَأَنفُسَهُمْ كَانُوا۟ يَظْلِمُونَ ١٧٧

178. Ciddii Eebe hanuuniya umbaa hanuuni, Cidduu Dhumiyana waa uun kuwa Khasaaray.

مَن يَهْدِ ٱللَّهُ فَهُوَ ٱلْمُهْتَدِى ۖ وَمَن يُضْلِلْ فَأُو۟لَٰٓئِكَ هُمُ ٱلْخَٰسِرُونَ ١٧٨

Saydooni ha ahaatee waxay ka Warrami Aayadahani Cid Cilmi la baray oo addunyo ka doortay, xaqana ka Leexday, noqdayna Baadi, oyna ku habboonayd inuu ku hanuuno, wuxuuse Jeclaaday Adduunyada, wuxuuna Raacay Hawadiisa Xun, wuxuuna la mid Yahay Eey had iyo Jeer Carrabka lalmin, waana sidaas Ciddii Beenisa Xaqa iyo Aayaadka Eebe, ayna habbontahay in Dadka looga warramo inay waantoomaan, Tusaale iyo Dadna iyagaa u xun, Illeen waxay Beeniyeen Aayaadka Eebe, waxayna Dulmiyeen Naftooda, Ciddii Eebe hanuuniyo yaa hanuuni, Tuu Dhumiyana wuu Dhumi, taasina waxay ku tusin Xumaanta Cid Eebe Cilmi baray oon ku Socon, Xaqana raacin, Adduunyana u Xishay, Cidday Dooni ha noqotee, ama Banii Israa‘iil ama Carabtii ama Cid kasta, Eebana wuxuu uun, Dadka ka Dooni Wanaag, Xaq raac, iyo Toosnaan Dhab ah. Al-Acraaf (175-178).

179. Waxaan u Abuuray Jahannamo wax badan oo Jinni iyo Insiba leh, waxayna Leeyihiin Quluub ayna wax ku Kasayn, waxayna Leeyihiin Indho ayna wax ku Arkayn, waxayna Leeyihiin Dhago ayna wax ku Maqlayn, Kuwaasina waa Xoolo oo kale. waana ka sii Dhunsanyihiin, kuwaasina waa uun kuwa Halmaansan.

وَلَقَدْ ذَرَأْنَا لِجَهَنَّمَ كَثِيرًا مِّنَ الْجِنِّ وَالْإِنسِ ۖ
لَهُمْ قُلُوبٌ لَّا يَفْقَهُونَ بِهَا وَلَهُمْ أَعْيُنٌ لَّا يُبْصِرُونَ بِهَا
وَلَهُمْ آذَانٌ لَّا يَسْمَعُونَ بِهَا ۚ أُولَٰئِكَ كَالْأَنْعَامِ بَلْ هُمْ
أَضَلُّ ۚ أُولَٰئِكَ هُمُ الْغَافِلُونَ ﴿١٧٩﴾

180. Eebe waxaa u Sugnaaday Magacyo Wanaag badan, ee ku Barya, Iskagana taga kuwa leexin Magacyadiisa, waxaannu ka abaal marin waxay Camal falayeen.

وَلِلَّهِ الْأَسْمَاءُ الْحُسْنَىٰ فَادْعُوهُ بِهَا ۖ وَذَرُوا الَّذِينَ
يُلْحِدُونَ فِي أَسْمَائِهِ ۚ سَيُجْزَوْنَ مَا كَانُوا
يَعْمَلُونَ ﴿١٨٠﴾

181. Waxaa ka mida waxaan Abuuray Ummad ku Hanuunsan Xaqa, Kuna socon.

وَمِمَّنْ خَلَقْنَا أُمَّةٌ يَهْدُونَ بِالْحَقِّ وَبِهِ
يَعْدِلُونَ ﴿١٨١﴾

Eebe isagaa Abuuray Jahannamo (Eebaan ka magan galaye) wuxuuna u Ballanqaaday inuu Jinni iyo Insi ka Buuxiyaa, Maxaayeelay wax ma kasayaan, Xubnaha Eebe siiyey ee ah: Qalbiga, Indho iyo Dhago toona kuma Intifaacayaan, waana Xoolo oo kale iyo ka sii daran, waana kuwo halmaamay Xaqa, Tan kale Ilaaheenna wayn wuxuu leeyahay Magacyo Wanaag badan oyna habboontahay in lagu baryo, lagana fogaado kuwa Leexin Magaca Eebe oo ka yeeli wuxuusan Raalli ka ahayn, oo ah Beenin, Leexin, si Xun u fasirid iyo wax kastoo wax u Dhimi, waana la abaal marin kuwaas.
waxaase jirtay Dad hanuunsan oo Xaqa ku socda, Siduu Rasuulku Yidhi: (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Lama waayo Koox Ummaddayda ah oo Xaqa ku Taagan oo muuqda wax dhibi karana uusan jirin inta Qiyaamadu ka Timaaddo. Waxaa wariyey Bukhaari. Al-Acraaf (179-181).

---

182. Kuwa Beeniyey Aayaadkanaga waxaannu ka qaban meel ayna Ogayn.

وَالَّذِينَ كَذَّبُوا بِآيَاتِنَا سَنَسْتَدْرِجُهُم مِّنْ حَيْثُ
لَا يَعْلَمُونَ ﴿١٨٢﴾

183. Waana Sugi Kaydkaygu «Awooddayduna» waa darantahay.

وَأُمْلِي لَهُمْ ۚ إِنَّ كَيْدِي مَتِينٌ ﴿١٨٣﴾

184. Miyeyna Fikirin inaan Saaxiibkooda (Nabiga) Waalli hayn, waxaan dige Cad ahayna uuna ahayn.

أَوَلَمْ يَتَفَكَّرُوا ۗ مَا بِصَاحِبِهِم مِّن جِنَّةٍ ۚ
إِنْ هُوَ إِلَّا نَذِيرٌ مُّبِينٌ ﴿١٨٤﴾

185. Miyeyna Dayin Xukunka Samooyinka iyo Dhulka, iyo waxa Eebe abuuray oo wax ah, iyo inay Mudantahay inay Dhawdahay Ajashoodu, Hadalkayse Quraanka ka dib Rumayn.

أَوَلَمْ يَنظُرُوا فِي مَلَكُوتِ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ
وَمَا خَلَقَ اللَّهُ مِن شَيْءٍ وَأَنْ عَسَىٰ أَن يَكُونَ قَدِ اقْتَرَبَ
أَجَلُهُمْ ۖ فَبِأَيِّ حَدِيثٍ بَعْدَهُ يُؤْمِنُونَ ﴿١٨٥﴾

186. Cidduu Dhumiyo Eebe wax Hanuunin ma leh. wuxuuna kaga tegi Xad gudubkooda iyagoo ku Wareersan.

مَن يُضْلِلِ ٱللَّهُ فَلَا هَادِىَ لَهُۥ ۚ وَيَذَرُهُمْ فِى طُغْيَٰنِهِمْ
يَعْمَهُونَ ﴿١٨٦﴾

187. Waxay ku Warsan Saacadda (Qiyaame) markay Sugnaan, waxaad Dhahdaa Ogaanshaheedu waa Eebahay Agtiisa, waqtigeeda wax Muujin kara oon Eebe ahayn ma jiro, waxay ku Cuslaatay Samooyinka iyo Dhulka, waxaan kado ahaynna idiinkuma Timaaddo, waxay ku warsan Saacadda sidii adoo og, waxaad dhahdaa Ogaanshaheedu waa uun Eebe Agtiisa Dadka Badankiisase ma oga (Xaalkaas).

يَسْـَٔلُونَكَ عَنِ ٱلسَّاعَةِ أَيَّانَ مُرْسَىٰهَا ۖ قُلْ إِنَّمَا عِلْمُهَا
عِندَ رَبِّى ۖ لَا يُجَلِّيهَا لِوَقْتِهَآ إِلَّا هُوَ ۚ ثَقُلَتْ فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ
وَٱلْأَرْضِ ۚ لَا تَأْتِيكُمْ إِلَّا بَغْتَةً ۗ يَسْـَٔلُونَكَ كَأَنَّكَ حَفِىٌّ
عَنْهَا ۖ قُلْ إِنَّمَا عِلْمُهَا عِندَ ٱللَّهِ وَلَٰكِنَّ أَكْثَرَ ٱلنَّاسِ
لَا يَعْلَمُونَ ﴿١٨٧﴾

Xaq beeniye Eebaa siduu doono u Ciqaabi, in Xoolo iyo Nolol lagu Imtixaamana waa Dhici kartaa, Eebana wuu sugi markuuse qabto Ciqaabtiisu way Darantahay, waana inay gaaladu Fikirto inaan Nabigu Waallayn. ee dige Cad uun yahay, hase eegeen Mulkiga iyo Xukunka Eebe Samooyinka iyo Dhulka, waxa Eebe abuuray, waxaana laga yaabaa inay Ajashoodu dhawdahay, maxayse rumayn Quraanka ka dib. Cidduu Eebe Dhumiyo wax hanuunin ma leh, waxayna ku wareeri Xumaanta. Saacadda Qiyaamana Cidaan Eebe ahayn ma oga wayna ku Cuslaatay Cirka iyo Dhulka, waxayna ku imaan kado, hase la rumeeyo, oo loo darbado. Xadiithna waxaa ku sugnaaday in qiyaamadu Dhici iyadoo Dad wax kala gadan, ama cidi Maali Xoolaheeda, ama Dhoobay Darkiisa oo Malaasi, ama Cunaddii kor u qaaday (Eebe ha naga Fududeeyo Dhibkeeda isagaa Awood leh). Al-Acraaf (182-187).

---

188. Waxaad Dhahdaa uma hanto Naftayda Nacfi iyo Dhib midna, wuxuu Eebe doono mooyee, haddaan ahay mid og waxa maqan waxaan badsan lahaa Khayrka imana taabteen Xumaani, anigu waxaan uun ahay u dige una Bishaareeye Qoomkii Rumayn (Xaqa).

قُل لَّآ أَمْلِكُ لِنَفْسِى نَفْعًا وَلَا ضَرًّا إِلَّا مَا شَآءَ ٱللَّهُ ۚ
وَلَوْ كُنتُ أَعْلَمُ ٱلْغَيْبَ لَٱسْتَكْثَرْتُ
مِنَ ٱلْخَيْرِ وَمَا مَسَّنِىَ ٱلسُّوٓءُ ۚ إِنْ أَنَا۠ إِلَّا نَذِيرٌ
وَبَشِيرٌ لِّقَوْمٍ يُؤْمِنُونَ ﴿١٨٨﴾

189. Eebe waa kan idinka abuuray Naf kaliya, kana yeelay Xaggeeda Haweenaydiisii inuu Weheshado markay Kulmeenna waxay qaadday uur Fudud Saasayna ahayd Markay Cuslaatayna waxay Baryeen Eebahood haddaad Na siiso (Ilmo) Suubban waxaan noqonaynaa kuwa Shugriya.

۞ هُوَ ٱلَّذِى خَلَقَكُم مِّن نَّفْسٍ وَٰحِدَةٍ وَجَعَلَ
مِنْهَا زَوْجَهَا لِيَسْكُنَ إِلَيْهَا ۖ فَلَمَّا تَغَشَّىٰهَا
حَمَلَتْ حَمْلًا خَفِيفًا فَمَرَّتْ بِهِۦ ۖ فَلَمَّآ أَثْقَلَت
دَّعَوَا ٱللَّهَ رَبَّهُمَا لَئِنْ ءَاتَيْتَنَا صَٰلِحًا لَّنَكُونَنَّ
مِنَ ٱلشَّٰكِرِينَ ﴿١٨٩﴾

190. Markuu siiyey mid Suubban waxay u Yeeleen wax la wadaaga wuxuu Eebe siiyey, Eebaa ka sarreeya waxay la Wadaajiyeen.

فَلَمَّآ ءَاتَىٰهُمَا صَٰلِحًا جَعَلَا لَهُۥ شُرَكَآءَ فِيمَآ ءَاتَىٰهُمَا ۚ فَتَعَٰلَى ٱللَّهُ عَمَّا يُشْرِكُونَ ١٩٠

Awoodda Eebaa iska leh, cid Nacfi iyo Dhib hananna ma jirto, Illeen Eebaa Faray Nabigiisa (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) inuu dadka u Caddeeyo Xaalkaas, hadduu Ogyahay waxa Maqanna wuxuu badsanlahaa Khayrka Dhibna uusan taabteen, waana uun u Dige U bishaareeye, Ciddii Xaqa Rumayn. Eebana Dadka wuxuu ka Abuuray Naf kaliya Aadam kana ahaysiiyey Haweenaydiisii si ay isugu xasilaan isuna Weheshadaan, markay kulmeenna ay Uuraysatay ayna Eebe warsadeen inuu Ilmo Suuban Siiyo, markaasay Dadku Eebe wax la wadaajiyaan Arrimihiisa, intay ku mahdin la-haayeen, Eebana waa ka sarreeyaa wax lala Wadaajiyo.
Waxaana la sheegay in kuwo Eebe wax la wadaajiyey ay ahaayeen Dad kale oon ahayn Aadam iyo Xaawo. Al-Acraaf (188-190).

---

191. Ma waxay la wadaajin waxaan wax Abuuran iyagana la Abuuro.

192. Oon Karaynna gargaar naftoo-dana aan u gargaarayn.

193. Haddaad ugu Yeedho Hanuun-kana idima raacaan waana isku mid haddaad u Yeedhaan iyo haddaad ka Aamustaanba.

194. Kuwaad caabudaysan (U yeedheysaan) Eebe ka Sokow waa Ad-doomo idinkoo kala ah, bal u Yeedha oo haydin Yeeleen (Aqbaleen) haddaad Run sheegaysaan.

195. Ma waxay Leeyihiin lugo ay ku Socdaan, mise waxay Leeyihiin Gacmo ay wax ku qabtaan mise waxay Leeyi-hiin indho ay wax ku arkaan, mise waxay leeyihiin Dhago ay wax ku Maq-laan, waxaad Dhahdaa u Yeedha Shurakadiinna ina Dhagra hana i sugina.

196. Waligaygu waa Ilaaha soo De-jiyey Kitaabka isagaana u Gargaara kuwa Suuban.

أَيُشْرِكُونَ مَا لَا يَخْلُقُ شَيْـًٔا وَهُمْ يُخْلَقُونَ ١٩١
وَلَا يَسْتَطِيعُونَ لَهُمْ نَصْرًا وَلَآ أَنفُسَهُمْ
يَنصُرُونَ ١٩٢
وَإِن تَدْعُوهُمْ إِلَى ٱلْهُدَىٰ لَا يَتَّبِعُوكُمْ ۚ سَوَآءٌ عَلَيْكُمْ
أَدَعَوْتُمُوهُمْ أَمْ أَنتُمْ صَٰمِتُونَ ١٩٣
إِنَّ ٱلَّذِينَ تَدْعُونَ مِن دُونِ ٱللَّهِ عِبَادٌ
أَمْثَالُكُمْ ۖ فَٱدْعُوهُمْ فَلْيَسْتَجِيبُوا۟
لَكُمْ إِن كُنتُمْ صَٰدِقِينَ ١٩٤
أَلَهُمْ أَرْجُلٌ يَمْشُونَ بِهَآ ۖ أَمْ لَهُمْ أَيْدٍ يَبْطِشُونَ
بِهَآ ۖ أَمْ لَهُمْ أَعْيُنٌ يُبْصِرُونَ بِهَآ ۖ أَمْ لَهُمْ ءَاذَانٌ
يَسْمَعُونَ بِهَا ۗ قُلِ ٱدْعُوا۟ شُرَكَآءَكُمْ ثُمَّ كِيدُونِ
فَلَا تُنظِرُونِ ١٩٥
إِنَّ وَلِـِّۧىَ ٱللَّهُ ٱلَّذِى نَزَّلَ ٱلْكِتَٰبَ ۖ وَهُوَ يَتَوَلَّى
ٱلصَّٰلِحِينَ ١٩٦

Siday Eebe ula Caabudi waxaan wax Abuurayn oo la Abuuri iyaga, karaynna inay u Gargaaraan ama Naftooda u Gargaarayn, haddaad wax toosin ugu Yeedhana kuma raacaan waana isku mid haddaad u yeedhaan ama ka Aamustaan, waana Addoomo idinkoo kale ah, mana ajiibaan hadday u Yeedhaan, Lugo ma leeyihiin ay ku Socdaan, ama Gacmo ay wax ku Qabtaan, ama Indho ay wax ku Arkaan, ama Dhago ay wax ku Maqlaan, ha soo Kulmiyaan Shurakadooda hana Dhagreen waxna yeyna sugin, Gargaaraha Nabiga ee kuwa Suubban Dhaqaaleeya waa Eebaha soo Dejiyey Kitaabka Quraanka ah, mana habboona, mana Bannaana in la Caabudo waxaan Eebe ahayn, waxna laga rajeeyo, Illeen Eebe umbaa Awoodd Buuxda lehe. Al-Acraaf (191-196).

197. Waxaad Caabudaysaan Eebe ka Sokow ma karaan Gargaarkiinna Naftoodana uma Gargaarayaan.

وَٱلَّذِينَ تَدۡعُونَ مِن دُونِهِۦ لَا يَسۡتَطِيعُونَ
نَصۡرَكُمۡ وَلَآ أَنفُسَهُمۡ يَنصُرُونَ ١٩٧

198. Hadday ugu Yeedhaan Hanuunkana ma Maqlaan waxaadna aragtaa iyagoo ku soo Eegi oon waxba Arkayn.

وَإِن تَدۡعُوهُمۡ إِلَى ٱلۡهُدَىٰ لَا يَسۡمَعُواْۖ وَتَرَىٰهُمۡ
يَنظُرُونَ إِلَيۡكَ وَهُمۡ لَا يُبۡصِرُونَ ١٩٨

199. Qaado waxa Fudud Farna Wanaagga kana Jeedso Jaahiliinta.

خُذِ ٱلۡعَفۡوَ وَأۡمُرۡ بِٱلۡعُرۡفِ وَأَعۡرِضۡ
عَنِ ٱلۡجَٰهِلِينَ ١٩٩

200. Hadduu ku Waswaasiyo Shaydaan waswaasiye ka Magangal Eebe isagaa Maqle oge ahe.

وَإِمَّا يَنزَغَنَّكَ مِنَ ٱلشَّيۡطَٰنِ نَزۡغٞ فَٱسۡتَعِذۡ
بِٱللَّهِۚ إِنَّهُۥ سَمِيعٌ عَلِيمٌ ٢٠٠

201. Kuwa Dhawrsaday hadduu Taabto Shar Shaydaan way Xusuustaan (Waantoomaan) wayna Arkaan Xaqa (Toosnaadaan).

إِنَّ ٱلَّذِينَ ٱتَّقَوۡاْ إِذَا مَسَّهُمۡ طَٰٓئِفٞ
مِّنَ ٱلشَّيۡطَٰنِ تَذَكَّرُواْ فَإِذَا هُم مُّبۡصِرُونَ ٢٠١

202. Walaalaha Shaydaankuse waxay ku Kaalmeeyan Baadida kamana Daalaan.

وَإِخۡوَٰنُهُمۡ يَمُدُّونَهُمۡ فِي ٱلۡغَيِّ ثُمَّ
لَا يُقۡصِرُونَ ٢٠٢

Waxa Eebe ka soo hadhay oo la Caabudo waa waxaan waxba karayn, Gargaari karinna, Naftoodana u Gargaari karin, kumana maqlaan, kumana Arkaan. Wuxuuna Eebe Fari Dabeecada wanaagga iyo Wanaagga oo la faro, Jaahiliintana laga Jeedsadaa, hadduu Shaydaan Waswaasiyo Ruuxana waa inuu Eebe ka magan galaa Illeen Eebaa waxna maqla waxna Oge. Maxaayeelay waxaa ka mida Xaalka kuwa Dhawrsada in marka Shaydaan Xumaan ku Taabto ay Xusuustaan Eebe Waantoomaanna, Kuwa Gaaloobayse waxaa sii Dhumiya Shaydaan Illeen Walaalay ka yeesheene. Aayadahanna waxay fari Dadka Wanaag, Ugana Digi Xumaanta, lagana Digtoonaado Shaydaanka, Gaalada, Jaahiliinta.
Waxaana Xadiith ah: Xidhiidhi Ciddii ku goysa, Siina Ciddii kuu diida, kana Jeedso Ciddii ku Dulmida. Saas darteed waa in Eebe uun la Caabudo, Wanaagna laga rajeeyo, Shaydaan iyo Colkiisna laga Digtoonaado. Al-Acraaf (197-202).

---

203. Haddaydaan ula Imaanin Aayad waxay Dhahaan Maxaad u soo dooran wayday, waxaad dhahdaa waxaan uun Raaci wixii layga waxyooday Xagga Eebahay Kaasina waa Xujooyin Xagga Eebihiin ka ahaatay iyo Hanuunka iyo Naxariista Ciddii Rumayn (Xaqa).

وَإِذَا لَمۡ تَأۡتِهِم بِـَٔايَةٖ قَالُواْ لَوۡلَا ٱجۡتَبَيۡتَهَاۚ
قُلۡ إِنَّمَآ أَتَّبِعُ مَا يُوحَىٰٓ إِلَيَّ مِن رَّبِّيۚ هَٰذَا بَصَآئِرُ
مِن رَّبِّكُمۡ وَهُدٗى وَرَحۡمَةٞ لِّقَوۡمٖ يُؤۡمِنُونَ ٢٠٣

204. Markii la Akhriyo Quraanka Dhagaysta una Dhag raariciyana in laydiin Naxariisto.

وَإِذَا قُرِئَ ٱلۡقُرۡءَانُ فَٱسۡتَمِعُواْ لَهُۥ
وَأَنصِتُواْ لَعَلَّكُمۡ تُرۡحَمُونَ ٢٠٤

205. U Xus Eebahaa Naftaada Khushuuc (Baryo) iyo Cabsi, iyo Qaylo la‘aan hadal, Aroor iyo Galabba, hana Noqon kuwa Halmaama (Xuska Eebe).

وَٱذۡكُر رَّبَّكَ فِي نَفۡسِكَ تَضَرُّعٗا وَخِيفَةٗ
وَدُونَ ٱلۡجَهۡرِ مِنَ ٱلۡقَوۡلِ بِٱلۡغُدُوِّ وَٱلۡأٓصَالِ
وَلَا تَكُن مِّنَ ٱلۡغَٰفِلِينَ ٢٠٥

206. Kuwa Eebe agtiisa ah iskama Kibriyaan Cibaadadiisa wayna u Tasbiixsadaan (Nasahaan) Isagayna u Sujuudaan.

إِنَّ ٱلَّذِينَ عِندَ رَبِّكَ لَا يَسۡتَكۡبِرُونَ عَنۡ عِبَادَتِهِۦ
وَيُسَبِّحُونَهُۥ وَلَهُۥ يَسۡجُدُونَ ۩ ٢٠٦

Gaaladu waxay warsadeen Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Inuu la yimaaddo Mucjisooyin Jeebkiisa ah, wuxuuse Raacaa wixii Eebe u waxyooday oo xaq ah, waxna lagu kala garto, Hanuun iyo Naxariisna u ah Ciddii Xaqa Rumayn, Xaquna waa u Cad yahay Ciddii raaci, oo markuu maqlo Quraankoo la Akhrin maqlo una Dhagraariciya, si loogu naxariisto. Waana in Eebe si Hoos iyo Khushuuca loo Xuso oon qaylo lahayn waqti kasta iyo Subax iyo Galabba, lana halmaamin. Malaa‘igta Eebe Ag joogtana Iskama wayneeyaan Cibaadadiisa, wayna nasahaan oo u Tasbiixsadaan wayna u Sujuudaan.
Saas darteed waa in Xaqa la Raaco, Quraankana la Akhriyo, Eebe loo Xuso Hoos Subax iyo Galabba, lana halmaamin, Illeen Malaa‘igtaa Caabudi, isna kibrinayn, una sujuudiye. Nabiguna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu Yidhi: Dadow u Dhimriya Naftiinna Illeen uma yeedhaysaan mid Dhaga la’ ama Maqane, ILaahaad u yeedhaysaan waa Wax Maqle, Dhawe, idiinkana Dhaw Cunaha Gaadiidkiinna.
Waxayna ahayd mar Dadku kor u Qaadeen Ducada. Al-Acraaf (203-206).

# Suurat Al-Anfaal

# سُورَةُ الأَنفَالِ

Magaca Eebe yaan ku Billaabaynaa ee Naxariis Guud iyo mid gaaraba Naxariista.

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Waxay ku warsan Dadku (Xukunka) Qaniimada, waxaad dhahdaa Qanimada waxaa iska leh Eebe iyo Rasuulka ee ka Dhawrsada Eebe Wanaajiyana Xaalka Dhexdiinna ah Eebana Adeeca iyo Rasuulkiisa haddaad kuwo Rumeeyey tihiin.

يَسۡـَٔلُونَكَ عَنِ ٱلۡأَنفَالِۖ قُلِ ٱلۡأَنفَالُ لِلَّهِ وَٱلرَّسُولِۖ
فَٱتَّقُواْ ٱللَّهَ وَأَصۡلِحُواْ ذَاتَ بَيۡنِكُمۡۖ وَأَطِيعُواْ
ٱللَّهَ وَرَسُولَهُۥٓ إِن كُنتُم مُّؤۡمِنِينَ ١

2. Mu‘miniinta dhabta ah waa uun kuwa marka Eebe la Xuso ay Cabsato Quluubtoodu, marka lagu Akhriyo korkooda Aayaadka Eebana ay Iimaan u kordhiso, Eebahood uun tala saarta,

إِنَّمَا ٱلۡمُؤۡمِنُونَ ٱلَّذِينَ إِذَا ذُكِرَ ٱللَّهُ وَجِلَتۡ
قُلُوبُهُمۡ وَإِذَا تُلِيَتۡ عَلَيۡهِمۡ ءَايَٰتُهُۥ زَادَتۡهُمۡ إِيمَٰنٗا
وَعَلَىٰ رَبِّهِمۡ يَتَوَكَّلُونَ ٢